QALBIYADA DHAAWACAN

©XUQUUQDA DAABACAADDA

Xuquuqda daabacadda waxay u dhowrsan tahay qoraaga buuggan, Xasan Nuur Cali (Kaabe). Lama daabaci karo lamana badin karo guud ahaan ama qeyb kamid ah iyadoo ogolaansho qoraal ah laga haysan qoraaga.

Daabacaadii koowaad, April 2017

Jigjiga, Ethiopia.

TUSMADA BUUGGA

Taariikh Nololeed…….....4

Odhaahda Hal-Abuurka…….5

Afeef……..8

Hibayn ……,….9

Tafaftir……..10

Mahadnaq…….11

Hordhac……....14

1) Naxdin jacayl laguma naaxo……...15

2) Jacayl calaf baan unacay…….32

3) Qadar dhacay canaan maleh……...51

4) Axdi maleh raggu jacaylna waa iblays…….68

Gabo-gabo……...111

TAARIIKH NOLOLEED .

Magacaygu waa Xasan Nuur Cali "Kaabe" Waxaan ku dhashay magaalada Jigjiga, sanadkii 1996, waxbarashadaydii dugsiga hoose waxaan ku qaatay Al-najah primary school, Xuseen giire ayaa ku qaatay dugsigaygii dhexe, dugsigii sare waxaa ku qaatay Sh. c/salaam secondary school.

Sidoo kale waxaan ka baxay kulliyada caafimaadka Jigjiga shahaadad Diploma, Wali waxaan ahay arday kuliyada caafimaadka jigjiga dhigta degree programmka.

Waxaan ku soo biiray bahda qalin maalka, oo aan jecelahay inshallah mustaqbalka inaan heer ka gaadho, arrimaha bulshada inaan wax ka qoro ayaan jecelahay gaar ahaan dhallinyarada, sidoo kale waxaan qoray sheekoo faneed iskugu jira kuwa malo awaal ah iyo kuwa dhab ahba.

Qallin kaygu wuxuu xor ka yahay inaan wax ka qoro, siyaadada, qabyaalada iyo wixii la halmaala, waxaan jecelahay wacyi galinta iyo horrumarinta bulshada.

ODHAAHDA HAL-ABUURKA

Qalbiyada Dhaawacan waa buug cajiib ah, markaan dheehanayey waxaa ixiiso galiyay xeel dheerida iyo dareenka uu ku qoray qoraaga buuggu.

_Maxamed Bashiir Siciid (Al-Faatix)
Qoraa

Xaqiiq kaliya ma'aha qalbiyo dhaawacan, balse wuxuu buugani ka turjumayaa noloshu inay meerto tahay iyo waliba sidii loo dhayi lahaa qalbiyada dhaawacan iyo duruufaha caashaqu keeno.

_Cabdiraxmaan Dayib Cumar(Hilaac).
Hal-abuur

.

Waxaan akhriyay buugaag farabadan oo sheeko faneed ah, walise maan arkin buug qalbiyada dhaawacan ka wacan, haddii ay noqon lahayd dhanka hab qoraalka iyo jaangooynta sheekada.

_Yaxye Yasiin Xasan (Ansaari)
Qoraa.

Waa buug daboolaya dhallinyaradu baahida ay u qabto akhriska qubanaha qisooyin dhab ah iyo kuwa malo- awaalka ahba.

Waa buug ka nadiif ah fikir cidhiidhiya isla markaasna cuskaday aragti saafi ah oo hal abuurnimo xaalaal ah ku dheehan tahay.
Wuxuu kor u qaadayaa awoodooda curineed waa cudud loogu hawl galayo kobcinta garaadka iyo maskaxdaba.

_Ridwaan Ismaaciil (Radhe)
Hal-abuur.

Qalbiyada dhaawacan waa buug bulshada gaar ahaan dhallinyarada saamaynaya, waa buug soo jiidasho leh, qofkasta oo jacayl soo maray ama wax ka garanaya uu ku qancayo.
Buugga qalbiyada dhaawacan waa buug loo qoray si farshaxamaysan, si ay ku dheehantahay garasho iyo aqoon dheer. Waan u hambalyaynayaa qoraaga buugan, waliba qoraa kaliya maaha waa aftahan garanaya soo jiidashada dadkiisa ku xeeran, mar labaad iyo mar saddexaad waxaan leeyahay hambalyo.

_ Umalkheyr cabdirisaaq axmed (Arabsiya)
Qoraa

Waayo aragnimada la sheegaa waa hadba qof inta uu waayo badan ugu soo kala baryeen meela kala duwan, qoraa xasan nuur "kaabe" waayo aragnimo badan inuu u leeyahay dhaqanka soomaaliga iyo noloshii soomaaliyeed, waxaa marag u ah dhigganaha qiimaha badan ee uu qalinkiisa ku duuggay.

Qoraagan da'da yar waa qoraa u bisil afkiisa, dadaal iyo juhdi badana galliyay barashada dhaqankiisa, buuggan oo ka hadlaya arrimo jacayl ayaa haddana baraya akhriska dhaqankii wanaagsanaa ee ay soomaali hiddaha u lahayd.

_Maxamed carab ismaaciil "Walaaleeye"
Qoraa.

AFEEF

Waxaan ka afeefanayaa wixii khalad ah ee iga dhacay inuu yahay mid aanan u qasdin, cidii markaa aragta waxaa ka codsanayaa inay igu baraarujiso, waxaa kale oo aan ka afeefanayaa af-soomaliga aan ku qoray buuggan oo ah afka caadiga ah ee dadku isu fahmaan, isumana aanan taxaluujin inaan af-suugaaneed ku qoro, sababtoo ah da'yarta maanta joogtaa ee aan doonayo inaan la hadlo waxaa laga yaabaa inay ku adkaato.

Haddii ay jiraan in kalmada qaarkood ay dadka gobollada kale dega fahmi waayaan ha la ii cudur daaro waayo anigu waxba ma hagran intii awoodeyda ah.

Ugu danbeyntii wixii aan asiibay waa mid xaga ilaahay ka yimid, wixii aan ku gafayna waa mid naftayda iyo shaydaanka xagiisa ka yimid

Alla Mahad leh.

HIBAYN

Dhigganaha Qalbiyada Dhaawacan waxaan u hibeeyay qofkas oo uu saamayn gaar ah ku leeyahay buuggani, sidoo kale waxaan u hibeeyay dhammaan akhristayaasha qiimaha badan meel walba oo ay joogaan.

TAFAFTIRE.

Abwaan beddel cabdilaahi geelle yare.

MAHADNAQ

Allaha weyn ee gacan qabashadiisa la'aanteed ay waxba ii suuragaleyn ayaa mahada koowaad, tan labaad iyo tan saddexaadba leh Allaha caafimaadka caqliga iyo garashada aan ku howgalay I siiyey, ayaa mahadaa is ka leh .

Hooyo Safiya Cabdi iyo Aabbo Nuur Cali ayaa iyaguna u mahad celinayaa, cimri dharar caafimaad ayaan Alle uga baryayaa, la'aantood guul maan gaadheen.

Walashay igu qaali ah, Yasmiin Axmed tan iyo bilowgii dhiganahayga kaalin aad u weynbay ka qaadatay, Umalkheyr cabdirisaaq axmed (Arabsiya), maalin iyo habeen waxay dhiirigalin iyo garab igu siisay sidii uu usoo bixi lahaa buuggan.

Esra Axmed Quule waxay sabab u ahayd inaan dhigganahayga ka dhigo mid sheekooyin ka kooban, waxaan marna ilaawayn siday iigala qayb qaateen walaalo igu qaali ah wakhtigoogana iigu hureen intaan ku guda jiray qorida buugan walaaladay, Cabdiraxamaan Dayib Cumar "Hilaac", Maxamed Bashiir Siciid "Al-faatix", Yaxye Yaasiin Xasan "Ansaari".

Aamiin qaasim ciise, oo nashqadeeyay jaldiga buugga ayaa sidoo kale u mahadcelinayaa.

Sigaar ah waxa aan ugu mahadceliyaa Hal Abuur Radwaan Ismaaciil (Radhe) oo iga caawiya suugaanta ku qoran dhiganahaygga.

Abwaan beddel cabdilaahi geelle yare, oo u hagar baxay tafaftirka buuggan wakhtiigiisa qaaliga ahna ii huray ayaa u mahadcelinayaa, cimri dharar caafimaad qab ayaan ALLE uga baryayaa.

Walaashay Amran c/khadar cali (Amaal) walaalkay cabdiqaadir nuur cali, walalkay axmed cabaas iyo yuusuf ahmed, baan iyagana u mahadceliyaa siday ii garab taagnaayeen, Waxaan kaloo ilaaweyn asxaabta kala ah;

C/qani cabdi muxumed (siska), aamina dayib nuur, maryan suldaan siciid, khadra cabdirisaaq (Intisaar), xamda cabdi xiis (ladan) axmed maxamed Cabdi(fani sh/siyaax).

Cawo maxamuud gudaal (ilwaad), fardawsa axmed maxamed (fadwa), Maxamed xuseen c/lahi (Maame), hibo cali muxumed (Nuura), Xasan wali c/raxmaan Filter,

Xasan Muuse cabdilahi, Axmed cusmaan, Axmed maxamed axmed,Deeqa aadan faarax, Asad cabdi dayib.

Ugu danbeyntii waxaan u mahadcelinayaa saaxiibaday, intaan bahwadaagta nahay iyo intaan wax soo wada baranay, dhammaantiin anoo idin kala saar saarayn haduu jiro erey ka qaalisan kana qiimo iyo qaayo badan waa mahadsantihiin ayaan idin odhan lahaa, rabi wanaag haydin siiyo.

HORDHAC

Allah ayaa mahad oo dhan iska leh, ila garab galay buuggayga, awoodiisuna tahay sirta ka danbaysa inuu soo baxo buuggan iyo guusha qof ahaaneed ee aan anigu gaadho, isagga la'aantii waxba iima suurto galeen.

Dhigganaha Qalbiyada Dhaawacan waa sheeko faneed marka laga reebo sheekadda ***"Axdi maleh raggu jacayln waa iblays"***, sababtaan u doortay ciwaankan ayaa ah inaan u arkay mid mudan ka hadalid ama qorid u baahan inay tahay oo ay jiraan qalbiyo fara badan oo dhaawacan, isla markaana aysan haysan qof u hadla oo iyaga si ugu yaraan dareenka jacaylku ku dheeyanyahay ee gubaya aan u ugu tabiyo kuwada qalbiyada dhaawacaya si ay ugu yaraan ugu noqoto kiniin ama irbad shaafisa qalbiga dhaawacan.

1

NAXDIN JACAYL LAGUMA NAAXO.

Waa dhallinyaro wakhtiga ayna hawlo lahayn soo hor fadhiista dukaan aad u macaamiil badan. Galab cadceeddu madaxa la sii galayso godkeeda, gabadh ilahay uu ku manaystay qurux iyo asturnaan ayaa soo hor martay goob ay fadhiyeen dhalinyaradu, dhammaan waa lawada jalleecay gabadhii markasaa la isku qabsaday anaa la hadli iyo mayee anaa la hadli, dhallinyaradii oo dhan waxaa la waayay mid ku dhiirrada inuu la hadlo gabadhii, wiil ka mid ah dhallinyaradii ayaa soo kacay oo la hadlay gabadhii sidii laba qof oo isgaranaya.

“Walaal sideed tahay baryahan kumaan arag miyaad joogtay?” ayuu kuyidhi. “walaal waan wanaagsanahay alxamdulilah, haa walaal waan joogay ee isu kay sheeg kuma xasuustee adoo raali ah!!”

“oo walaalo ma sidaa ayaad isku masaxdaa”. ayuu yidhi isagoo Dhoollo caddaynaya, walaalo waa hebel “walaal iga raali ahow waan deg-deg sanahay ma kulmi karnaa markale, laga yaaba inaan ku soo xasuusto.?

” Haa walaal xaafadu sow halkii maaha? numberkaaga isii waan soo wada hadlaynaaye. ayuu ku yidhi. sidii laba qof oo is garanaya Gabadhii oo yaaban ayaa ugu jawaabtay walaal haye wakaas number kaygu ee nabadey.

Intii ay sii socotay waxaa ku soo noqnoqonayay hadalkii wiilka, iyadoo isleh wiilkan ku garanaya ee aadan garanaynin waa kuma? muuqaalkii wiilka ayay u bogtay, wiilkii intuu dhallinyaradii ku laabtay isagoo qoslayuu ku yidhi, haye ma aragteen? “laab la kacdeene, luggana kuma taagnidiin!!” “Haa war saaxib nin adag ayaad tahay gabadh haybad eebbeheen siiyay weeye ku adkoow inanta.” ayay ku yidhaahdeen.

Goor fiid ah ayuu nambarkii gabadha wacay, “habeen wanaagsan walaal sideed tahay waa hebel?”, “walaal waan fiicanahay.”

Is waraysi dheer ka dib, waa la ballamay maalinkii oo dhan waxaa uu inanku isu diyaarinayay siduu uga dhaadhicin lahaa jacayl uu u qabo gabadha, balse wakhtigii aad ayuu ugu dheeraaday oo wuu yaabanyahay!!.

Waxaa gaadhi wayday saacaddii balanta, goortii ballantii ayaa la gaadhay, waa fiid jawigu aad u fiicanyahay, cirkuna lahayn wax fad ah, Wuxuu kaga soo horreeyay goobtii ay ku ballameen, isagoo isleh; billow gabadhu kuu jartaa ,balse waxaa si kedis ah isagoo isla sheekaysanaya gadaashiisa kaga soo baxday gabadhii, salaan diirran iyo soo dhawayn dabadeed, waa la iswaraystay, Waxaa uu u sheegay inuu jacayl u qaaday gabadha isla maalinkii ay kulmeen kana dalbanayo inay la qaado dhankeeda, Waxayse ugu jawaabtay, “walaal waan ka xumahay, walaalo ayaynu nahay oo jacalkan aad sheegaysaba waxaa kaweyn walaaltinimada dhexdeena taal, mana jecli inaan ku degdego xidhiidh aan kula sameeyo”.

Raggu waxaa uu dumarka ku yahay, sida xarku geedka kuyahay, markuu ku celceliyay weedho aad u jilicsan inantii waxay aqbashay jacaylkii balse waxay u sheegtay inay shuruud ku xidhayso, waxay ku tidhi "axdi ma ila gali.?, inaad jacaylka sidaan kuula bilaabay aad iila dhammaynayso?.

Igana ballan qaad Nolosha inaadan marna igu cidlayneyn oo aan noqonayno ul iyo diir keed". " waa balan aan kaa qaadayo inta noloshayda ka dhiman inaanan kugu cidlayn doonin nolosha, aanad tahay wehelkayga" ayuu ugu jawaabay. Isagoo u sii raacinaya tixdan;

- Haddaan hiyigayga ,hanaqa ku seexsho
- Nafta kuu hibeeyoo, i hoo ku idhaahdo
- Raggu aamin maahoo, layskuma haleeye
- Bilow aan hadhowto, halis aan mutaa
- Naftaad ii hibeysay
- anaa hagar daamo
- Hujuun iyo ciilka
- haydaar iyo naxdin
- Hobeey ugu dhaaran
- hagarba danteena.

Muddo dheer kadib, xidhiidh koodi waxa uu noqday mid dadka oo dhammi ku sheekaystaan, sida ay isu jecelyihiin, noloshana ay isugu faraxsanyihin, asxaabtoodu waxay ku odhan jireen, indho aan heblla iyo hebel ahayn ma lihid.
Wiilka;

- bogaan kugu sharaxayoo
- shafkaan kugu sitaaye
- kalgacaylkan shaac baxay
- ka ilaali shaydaan
- nacab shiida baa jiree.

Waxay ugu jawaaabtay;

- shiddo inaan u quudhiyo
- shallow inaan ka tuuraba
- caashaqu ka sharaf mudan
- dadku sheeko badane
- shucaac lagu hirtaan nahee
- kalgacaylka shaac baxay
- uma quudho shiish nacab.

Maalinba maalinka ka danbaysa waxaa soo badanayay is fahan labada dhinac ah, oo inanku mar walba inanta ku qabsanayo waxyaalo yaryar, kadib markii uu bilaabay inuu gabadh kale oon iyada ahayn sheeko la wadaago.

Waxaa yaraday kulankii iyo hadalkii wakhti walba joogtada ahaa, gabadhiina waxay wayday todobaadyo, inankii meel ay kala soo xidhiidho majirto, wuuna beddelay telphonkii uu watay number kale ayuuu qaatay, talo ayaa ku ciirtay waxay u qortay warqad uguna dhiibtay mid kamid ah saaxiibadii, si uu ugu geeyo farriinta, iyadoo leh;

"Anigu waxaan ahaa qof aan jacayl soo arag dhib iyo dheeftiisa, jacaylka waxaan ka aaminsanaa inuu yahay farxad aan dhammaanayn, markaan ku jeclaanayay anigu magaranayo, sidaan kuu jeclaaday waxaan kaa filayay sidaan kuu jecelahay inaad ii jeceshay, waayo waxaad ahayd qofkii iigu horreeyay een jeclaado waliba si dhab ah.

Markaad hubsatay inaanan indho kale oon adiga ahayn lahayn ayaa waxaad la soo baxday waji cusub, dulqaad kaagii iyo xiisahaagi way yaraadeen anigana murugadaydii way badatay.

Qaali waan kuu xiisay ma qiyaasi karo siday naftaydu kuu tabayso, haddii aad maanta sidaa ii xumaynayso ood ii cidlaynayso maxaad jacaylkan iigu abuuraysay?, miyaad ilowday inaad ii balanqaaday inaadan nolosha igu cidlaynayn?, jacaylka adaa ibaray mana rabo inaan ilbidhiqsi kuwaayo, adna wajiga ayaad iibeddelatay, waad iska kay dheeraysay.

Ma aqaano ruux aan adiga ahayn sida loola dhaqmo, wax walba adigaa i baray ii noqo sidaad ii ahayd, haddaad doonto ha ila hadlin oo ha isoo xidhiidhin balse markaan kuu baahdo telefonka ha igu dhegaysan, wajigaaga ha iga qarin anigaa kuu baahan maanta, noloshayda uma malaynayo inaan kaa maarmi karo waad mahadsantahay noloshaydii".

Galab uu roob mahiigan ah da'ayay ayuu si lama filaan ah u soo galay dukaan ay gabadhu ka adeeganaysay, isagoo roobka kaga gabbo isleh, waxaa isku dhacay indhahoodii.

"Maxaa kugu dhacay oo baryahan warkaaga aan u waayay, maxaad ila soo xidhiidhi wayday, farriintaan kuu soo dirayna iiga soo jawaabi weyday?" ayay ku tidhi si degdeg kujiro.

Balse waxaa uu ka dhaadhiciyay inuu ka maqnaa magaalada meel kalena hawlo shaqo u tagey, " waayahee aan is aragno?" ayay ku tidhi. waxay ku noqotay Laf dhuun gashay naxdin aad ah, balse wuu ku badbaaday dabin kuu u maleegay oo ahaa mid been ah.

Maalin kadib ayay is arkeen, waxay ku tidhi, "xubi wax ii sheeg siday wax u jiraan waxba hayga qarinin?", " wax walba waa sidaan kuu sheegay ayuu ugu jawaabay", "oo sowdigii telefoonka watay habeenkii dhaweyd?, " maya qaali waxaan ka soo qaatay saaxibkay hebel oo Aabbo lacag ii soo dirayay ayaan kala hadlayay ayuu ugu jawaabay".

"Xubi miyaynan nolosha axdi wada dhigan?, aaway nolosha wixii aan ku heshiinay", "wax ma kuu sheegaa ayuu kuyidhi.?", " haa ii sheeg waxba ha iga qarinine ayay ugu jawaabtay" markaasu ku yidhi "jacaylkii waan liqay sidaa darteed ilaahay dhiniciisa ha kaa gar-gaaro."

Way ka niyad jabtay waxa uu ku leeyahay iyadoo yaaban ayay ku tidhi wax ma kuu sheegaa aniguna "Haa"ayuu ugu jawaabay;

Gabadha;

- ballankii aad qaadiyo
- wacadkii ha baal marin
- naftaydana badbaadi
- boowe adi la'aantaa
- dhimashaan ka door bidey.

Wuxuu ugu jawaabay;

- walal dhimasho daaye
- dhul gariir ha kugu dhaco
- ma anaad wax iidhimi
- kolna dhogor shabeel xidho
- kolna dhixirka naagaha.

Wuu iskaga dhaqaaqay isagoo ku leh "ilahay hakulajiro".

Habeenkii hurdo way ladi weyday, iyadoo kolna fikiraysa kolna go'aan qaadanaysa, waxaa ku soo noqnoqonayay hadaladi jacaylkeedi, waxay dhinac isu rogtaba waxaa mudh soo tidhi cadceeddi, barqadii ayay go'aan ku gaadhay inay dharka ugu quruxda badan xidhato si ay ugu tagto meesha uu joogo.

Waxay ka sii iibsatay batrool & kabriid dukaan jaar la ahaa ,waxayna ugu tagtay goob suuq ah, dad badani joogaan, goobtan inta badan wuxuu ku ciyaara shax, inan agfadhiyay ayay ku tidhi inankaas sii jeeda ee shaxda ciyaaraya iisoo jeedi walal adigoo raali ah?.

Wuu soo jaleecay waaba gabadhii intuu soo kacay ayuu u yimid "bal waran?" ayuu ku yidhi", "waa nabad" ayay ugu jawaabtay ee wixii aan kugu lahaa waxna ina ma kaaga soo duxeen?", "dan kahadal?," ayuu ku yidhi "ka hadlay" ayay ugu jawaabtay.

Waxay tustay inay dhalo baatrool iyo kabriida gacanta ku hayso, rabtana inay is gubto haddaad afkaaga iga odhan weydo jacaylka sidaan kuula bilaabay ayaan kula dhammaynayaa.?

Waa sidii ay horey go'aan ugu soo gaadhayee inay is gubayso hadda ayay u sheegtay. Si bilaa naxariis ah oo ay ku jirto isla weyni ayuu ugu jawaabay "waan is gubiyaa haddaad doonto haddaba is ololi?" wuuna ka dhaqaaqay, iyadoo wiilkii la hadlaysa ayay ku tidhi ereyadan;

- Dartaa anigoo, udulooboo
- Daranyoobaad, i dacal martee
- Duulaanka jacayl, dhaaxuu idiloon
- Ilma dindimoo, diifta qarsadee
- Hansi dumareed, nabsi daran baan
- Kugu dulfuroon, dushaada dhigee
- Duxda hadalkay, adigaan dartaa
- Duni u nacoon, isu dilayaa.

Waxay tin ilaa cidhib isku shubtay batroolkii dhalada ugu jiray, ka dibna waxay is qabad siisay kabriid, mar kaliya waxaa is qabsaday dab aad u weyn iyo qaylo, dadkii suuqa joogey ayaa isku soo jabay, Waxa la isku dayay in la damiyo dabkan ka dul holcaya gabadha is gubtay, nasiib wanaag waxaa lagu guuleystay in la damiyo.

Dhakhtarka ayaa loola cararey gabadhii si loo badbaadiyo nafteeda halista gashay, nasiib darro isagoo qadar yar mar kaas uun maqan ayaa waxaa u yimid wiilkii ay wada ciyaarayeen shaxda isagoo anfariirsan una sheegay inay is gubtay gabadhii hebla ahayd, loona qaaday dhankaas iyo dhakhtarka fajac iyo yaab kadib; Waxaa isaga ay naxsan oo wajigiisa ka muuqato murugo aad u badan, uu u jihaystay dhankaa iyo dhakhtarkii loogu sheegay in loola cararay.

Wax yar kadib waxaa uu soo gaadhay isagoo neef tuuraya dhididna uu qooyay jidhkiisa, ayay Dhakhaatirtu u sheegeen, inay gabadha xaaladeedu xun tahay, sidaa daraadeed intay awoodaan baxnaanin doonaan isaguna uu is dajiyo.

Inankii wal-wal iyo wal-bahaar ayaa haysta wajigiisana waxa ka muuqda murugo aad u weyn, waa u xanuun, hareeraha waxaa garab taagan saaxiibadi, iyagoo isku dayaya inay niyada u dhisaan, oo dhiirri galinaya, Wuxuu ku hadaaqayaa “Ma dhabay ka ahayd, Dhalanteed baan moodayee?”.

Saacado ka dib, dhakhaatirtii Waxay u ogalaadeen inuu u gali karo gabadha, Indhihisa waxa ka burqanaya illin, hadalku wuu ku dhag-dhagayaa oo si dhammays ah uma awoodo inuu u hadlo, waxaa uu fadhiistay sariirta ay gabadhu ku jiifto madaxeeda.

Gabadhu indhaha ayay kala socotaa awood uma laha inay hadasho, balse hoos cod gaaban ayay ku hadlaysaa, ii soo dhawoow ayay ku tidhi. xaaladeeduna aad ayay u liidataa, Jidhkeedu meel fayow malaha, wajigu ha ugu darnaadee.

Iyadoo ilmaynaysa ayay la hadlaysaa, maro ayuu kaga tirayaa illinta ka da'aysa waxay leedahay;

- ragga dunida nool, kaan duur xushee
- aan ka door bidow, qalbi dooxanoo
- jacayl uu degoo, dab ku oogaybaa
- kula dardaarmee, dabuubtiisa dhuuxo
- anigoo dumara. nugul kuu il daran
- diif iyo haraad, adaa igu daayoo
- farxadii dorraad, iga dacar marshoo
- duni kuu nacee, daayin waa ilaah
- nabsi waa dulaan, layska dadi Karin

- ifkana dartaa, dalan baabiyee
- daarta aakhiraan, Kaaga aar gudan.

Waa la aamusiin kari waayay, wuu baroortay, waxa uu ka qoomameynayay sidii uu axdigii uga baxay, isagoo gabadh kale oo labaad xidhiidh la bilaabay iskagana dhigayo mid daacad ah.

Gabadhii labaad ee haasawuhu ka dhexeeyay wiilka, ayaa maqashay gabdho ay gaadhi wada saarnaayeen oo ku sheekaysanaya gabadhi is gubtay, waxayna dhagta la siiraacday sheekadii gabdhaha iyagoo leh "Naa saaxib Hebllaadii jaarkeenaa hebel daraadii bay isu gubtay oo dhakhtarkaa la dhigay".

"Is gubtayaa!! Oo miyay waalnayd ragga sanadka ayaa isu jilciya haddaad af-garan weydo isagaa aakhiro loo diraa", "Mayee saaxib aad bay ujeclayd, wacadkii ay dhigteen ayuu kaga baxay, waa rag xaalkiiye mid kale ayuu haasaawe la bilaabay baa la yidhi. "

Gabadhii labaad ee haasaawuhu ka dhexeeyay, markay intaa maqashay naxdin daraadeed; way gariirtay, iyadoo hoos isula hadlaysa ayay tidhi.

" Alla !! ma anuu rabay inuu sidaasi si la mid ah ii waxyeeleeyo, oo haddaan ogahay inuu gabadh kale la sheekaysto ma anaa juuq u odhan lahaa ahey ah! Maanta laga bilaabbo waa inaan xidhiidhka u jaraaa xus kudhacaha." markaasay hoos ahaan ka maan sootay iyadoo leh;

- khiyaali jacayloo khaayinku jilaayo
- inaan la khidmeeyaan hadhawna khasaaro
- khasada ma awoodo,khadkaagii maqloo
- khabiirka lugooyee,haweenka khafiifsha
- inaad tahay khaayin,khilaaf kama taagnee
- khaayistey sirtaadu khashifmoow salaama.

Gabadha xaaladeeda caafimaad waa laga dayrinayay labadii maalmood ee ugu danbeeyay, Xilli laga soo baxay salaadda subax dhulkuna uu soo caddaanayo, waxaa is qabsatay qaylo iyo sawaxan xooggan, waxaa la sheegay inay dhimatay gabadhii is gubtay.!!!!

Naxdin iyo anfariir!!! Wiilkii wuu u qaadan waayay geerida naxdinta leh ee ku timid gabadha. waxaa uu isku duubayaa maydka isagoo leh;

"Way dhimatayaa!!!, Ma dhabay ka ahayd, Dhalanteed baan moodayee." ereyadan iyo ereyo kale oo dadka dhegahooda saamayn ku yeeshay ayuu ku hadaaqayay isagoo leh;

- Ma dhabaa warkani dhiilada watee
- Dhegahaygu maqleen ma dhabaa aheyd
- Way dhimatayoo iilbaa la dhigay
- Ma dhabaa midaan aan dhur sugayay baa
- Kala dheelmanoo ay dhaceen markale
- Dhaayihii jeclaa inay soo dheehdaan
- Muddan dhayal sadoo aan ku dheelayee
- Dhaxaan cidlada aan ku dhaafayee
- Hadday dhimatay tii anna kama dhacee
- Qalbi dhaawacmaan dhakhtar dhayi kareyn.

Subixii hore waxaa la isu diyaariyay in la aaso meydka . Dadkoo dhani waxay tacsi tiiranyo leh in samir iyo iiman ilahay ka siiyo la wadaagayaan wiilkii iyo gabadha ehelkeeda, balse inanka miyirkiisu ma joogo, markuu waxyar joogaba waxaa uu ku hadaaqayaa "Ma dhabay ka ahayd, Dhalanteed baan moodayee.?

Wuxuu yidhi;

- Dhaaxaan soo hungeeyay ruux hadaf loo
- Haween aan luley beerkiyo hanaqoo
- Ilayn hansi dumar lagama hadhee
- Hoogeyse dorraato midaan ka huleelay
- Daraadey haddii loogu habey iilka
- Tii aan u hagradeyna hadii ay I hiiftay
- Cakuye maankiyo xiskaa hantaaqmoo
- Haddaan aniguna haylaha dhigayaa.

Maalinba maalinka ka danbaysa caafimaadkiisu wuu sii liidanayaa ilaa heer uu ka gaadhay inuu waasho, waxaa uu badanaa hooy ka dhigtay oo uu fadhiistaa meel qashin qub ah una dhaw dhakhtarkii ay ku dhimatay gabadhu, Timuhu aad ayay ugu baxeen, diifta ka muuqata lama moodo inuu mar fayoobaa.

Ugu danbeyntii waxaa asxaabtiisii iyo qoyskiisu isu raaceen inay geeyaan meel lagu xanaaneeyo xarumaha dadka dhimirkoodu dhimanyahay lagu daryeelo.

DHAMMAAD

2

JACAYL CALAF BAAN U NACAY.

Waa xilli kaliil ah, dhulkuna omas yahay mandheertu ayna xaabka qaadeyn, dhirtuna badi ay caleen ridatay, dhinbiiishuna ay daadatay. Siigada dhulka ka kacdaa ay cirka isku shareerto. Xooluhuna abaar awgeed ay iyagu is hoganayaan iyagoo tuban banano cidlo ah .

Anigoo dhex jooga sabankas oo aad u xumaa ayaa jacayl wax ma hubsade ah igu habsaday waxaa ila cuslaatay hanashada ruuxa aan jantay, sababtoo ah waxaa igu taagsaday wakhtiga. Waxaan ahaa ruux uu ka weydoobay jeebku.

Malahayn awood aan ku kasbado hal-dhaada aan calmaday sababtoo ah waxaa jirtay abaar aad u daran oo nagu reebtay baahi aad u ballaadhan. Walow ay sidaa tahay, maan ahayn ruux quus dhiga waxaan ahaa ruux markasta talo saarta rabigii fishana sareedo iyo seerma weydo curata.

Waxay ahayd ruux ku suntan astaan dhaqameed farshaxamaysan, waxay ku labisnayd dharka gaarka u ah hiddaha soomaaliyeed.

Dhacle iyo boqor waxay isku taxday kuul cunaabi ah. Waxaan la kulmay iyadoo dhex joogta xoolahooda ay abaartu haleeshay xilli ay aad uga walaacsanayd wakhtiga daran ee ku taagsaday.

Waxay soohaysay maydhax galooleed bilic ahaan waa ruux ishii aragtaa beryo jamato, quruxda waa ruux alle uu dhammeeyay. arrimaha ay aad ka iigu dhaygag galisay waxaa kamid ahaa; midab maarrin dhalaal ah dhaban dheeh ku yaalo, dabno madow,luqun dheer oo cabaadhyo leh, dhex yari,timo haabtay sinaheeda laafyood damac beera.hab joog sida geenyo ugub ah.

Isla mar ahaantaas dhugashadeedi kabacdi waxaa igu soo xaadiray dareen dhab ah oo biyo dhigay lubigeyga.nafta ay hanatay yaa ku tallantay hannashada gobtay jamatay.

Go'aan waxaan ku gaadhay inaan u bandhigto dareen ka guuxaya laabtayda maadama ay tahay ruux lama dhaafaana jaaheeda ayaan hortagay salaan diirran iyo soo dhaweyn kadib;

Waxaan hoos fadhiisanay geed damal ah oo aad u hadh qaboobaa.inkastoo lagu jiray xilli kulayle ah, hooskii geedka ayaan fadhi yaxoobsi sheeko kula kala baxnay.

Haasaawe xeel dheer ka bacdi is af garasho wacan ayaan ku gorfoynay arrintayadii ugub waxaan ka dareemay ogolaansho, ifafaalo guur kuladhan.maadama oon ahay doob wakhtigiisii jooga.

- Qaayo wacnida, anaa kuu qiray
- Qalanjooy macaan, qurux badanidaa

Waxaan anba qaadnay jacayl ay ku dheehantahay kalsooni iyo dareen dhab ah badanaa waxaan kulmi jirnay wakhtiga xoolaha ay la joogto.

Mararka qaarkood waxaan xoolaha u oroor gayn jirnay goobo aad uga fog rugaha aan deganahay waxaan soo laaban jirnay wakhtiga ay soo fulaan xooluhu, intaan dhexda ku jirnana haasaawe iyo hadalo jalbeebsan ayaan is dhaafsanaynay.

Abaartii oo kasii dartay awgeed, waxaa la sheegay inuu naq aad u wanaagsan uu ku hoorey meel loo soconayo 5 caano maal.

Bulshadii waxay u jaraysteen xilli cadceedu markaas mudh ka soo tidhi godkeeda. Alaabtoodiina ku rarteen hayinadii reerka gaadiidka u ahaa.

Waxay u jiheysteen goobtii naqu ku hoobsaday ee ay sahanka ku yimaadeen, balse waan kala haboownay midii qudhaydu jamatay,.kadib geedigii markii la hayaan furey, waxaa la dhidbay dhigaan dhigaal udubna dhexda lagu taagay xakabna loo raaciyay harrarna dusha laga saaray waxaa lagu naagaaday raxmadii iyo roobkii rabi arlada dhigay.

Naqu wuxuu ahaa mid lagu diif iyo harraad belay, naflihii inbadan ka qatanaa neecawda udgoon waxay noqdeen kuwo hirqaday naxariista Eebbe.

Maalmo kooban kadib markaan si wacan u nagaanay reerkuna loxosbaxay waxaa qalbigayga ku soo dhacay inaan dib u raadiyo dhabeeshii caashaqa igu daartay.

Waxaan ka dhex goobay dhaammaan reerihii soo ciirsi biday rugaha todobka gu iyo tusku ku hooray, ku maan guuleysan inaan helo haybteeda walow aan dhaaxo raadiyay xogteeda.

Xilli aan is idhi heli maysid waxaa ii yimid war sheegaya haldhaa halka ay ku sugantahay waxaan u raxan qaatay damcayna inaan beegsado halka haybta laygu tilmaamay. Waxaan sii sadcaalay anigoo hilin habowsan waxaan qar iyo buur jeexaba waxaan ku beegsamay reero meel deggan.

Xogti waxay isku si dhiibtay inaan helo haldhaa gurigooda, xilligaas anigoo maraya irridda xaafadooda horteeda waxaan maqlay alalaas iyo mashxarad baxaysa.

Dhudi walaasheed oo aad u riyaaqsan irridda albaabkana horfadhida ayaan weydiiyay inay Dhudi joogto iyo inkale.

Waxayse iisheegtay in Dhudi barwaaqada loo aroos raaciyay.run ahaantii waan u qaadan waayay waxay ii noqotay maalin madow,sababtoo ah waxaan seegay ruuxaan dhib u mutay darteed naftaydana aan ku sooray.

Anigoo murugaysan wajigayguna isbeddelay ayay Dhudi soo baxday waxay igu salaantay lis caano ah, iyadoo aad uga walaacsan isaseegga calafku keenay, niyyadda ayay ii dajisey kadib waxay ii sheegtay siday wax u dhaceen.

Dhudi;

- Dhaxaad igu habtay, jacayl hagar layn
- Dhaxaad Ii hurtay, hed iyo hantiyoo
- Dhaxaad hablahaba, hormuud iga yeeshay
- Haduu calaf baajay, halkaan tiigsanaynay
- Hor Alle niyad duco, kuu haneeyay
- Ha kalifin naftee, samirka hambayso
- Haldhaa quruxlaad, mar uun hantiyiye.

Geedi;

- Han abaarsaday, naf hungoowdaa
- Heedadowdoo, haba tacaysee
- Hadduu calaf, yidhi hananmaysid
- Hilow tamar leh, hedaydaay samir

Waan ilmeynayaa hadalada qaarkood markay ileedahay sababtoo ah marna kumaan hamiyeeyn inay ninkale dhaxdin u noqon doonto.

Waxayse igu waanisay hadalo xikmadaysan oo tilmaamaya qadarka inuu Eebbe hayo.balse hadaladeeda kumaan uur qabowsan, Waxay ii ahaayeen kuwo dakhraya qalbiga nasiibku dhaawacay.

Inkastoy talo ii dhammaysay maan yeelan dheg wax ku qaadata, waxaan waayay niyad aan ku quusto kuna laabto, waxaan noqday maqane jooge.

Talo ayaa igu ciirtay magaranayo meel aan wax ka bilaabbo waxaa ii muuqda guri laba daryaale ah oo aad loogu sharraxay agab dhaqameedkeenii soomaliyeed.

Dhallintu waxay isugu yimaadeen inay arooska ka qayb qaataan qaarkood waxay ciyaarayaan ciyaaro kala duwan ooy dhaantadu kow ka tahay.

Aniguse waxaan kududaa meel wax yar u jirta goobta aroosku ka dhacayo,ma joogo mana jiifsan karo oo safarkii dheeraa een soo galay waan ilaaway daalkii .

Illinta indhahayga ka da'aysa waxay qoysay gadhkayga, Dhudi way iga war haysaa kolba xaaladda aan ku suganahay oo waxa ay ii soo diraysaa walaasheed.

Dhool oo ka yar Dhudi ayaa ii timid iina sheegtay inay walaasheed Dhudi mudo ay i raadinaysay balse uu aabboheed siiyay nin uu wakhti hore u ballan qaaday inuu u dhisayo.

Dhool waxay ii keentay xeedho ay ku jirto shuuro dusha lagaga daray subag iidaaman iyo caano lis ah, waxay ii sheegtay inay soo illowday fandhaalkii lagu cuni lahaa.

Intay maqnayd maskaxdayda waxaa ka dhex guuxayay su'aalo dhowr ah oo ay ka mid tahay; Waayo ninka guursaday Dhudi.? Ma lagayaabaa inuu maal leeyahay ninkani la siiyay?.

Anigoo isku mashquulsan ayaa waxaa timid Dhool iina sheegtay inay soo raagtay meeshoo cidhiidhi ahayd awaadadeed,dhib maleh ayaan ku idhi, waxaan darsaday fandhaalka shuuradii i hortaalay, balse iima dhadhamayso cuntadu .kaftan iyo sheeko dheer ayaa na dhex martay. Aniga iyo Dhool, mararka qaarkood waan iska baxayaa, Dhool waxay ii sheegtay inay dareemayso dhibaatadani haysata .

Waxay ii soo bandhigtay inaan labadayadu xidhiidh jacayl ah wada bilowno sidaasina aan ku ilaawo Dhudi.

Waxaan ku wargaliyay inaanan awood u lahayn inaan arrinkaas aqbalo sababtoo ah aniga qalbigayga Dhudi kaliya ayaan siiyay kun hablood hadii ka xullashadooda la i faro kama doorbideen iyada mid kale.

Aroortii hore Dhudi ayaa igu soo kalahday anigoo hurda ardaaga reerka

Dhudi; Subax wanaagsan Geedi.

Geedi; wanaagsan oo wacan Dhudi maxaad ku barideen. ?

Dhudi; geedi waanu fiicanahay ilahay mahadi weeye wataas oo barwaaqadii iyo nimcadii Alle na siiyay ayaan ku jirnaa

Geedi; Allaha inoo barakeeyo abaar ka xumayd abaartii ina soo martay may jirin.

Markaan intaas is weydaarsanay ilayn labadayaduba waanu aamusnay in cabbaar ah markaan sidaa ahayn ayay Dhudi waydiisay maxaa kugu dhacay geedi? Waad yara fooftaye ma reerkii ayaad ka fikiraysaa?

Waxaan ugu jawaabay; maya Dhudi sidaad moodey maaha, axdi iyo balan weynagii wada dhiganay intaynaan soo guurin, inaan nasiib xumahayna waxaad ku garanaysaa weynagii kala hallownay midkeenba meel tagay.

Muddana waan ku baadi goobayay ilaa aanka ogaadey inaad halkan joogto, maan filayn inaan la kulmi jawi noocan oo kale ah , balse wey dhacday.

Anigu kaligaa ayaan kaa ishaartay inta gashaanti guudka dabatay, maxaad iigu sheegi weyday in beri hore lagu siiyay ninkan ? haddii aan adiga ku waayo garan maayo sidan noqon doono.

GEEDI;

- Taan u dhaartayee, ifka dhursugaay
- Axdi dhaxal gala, midaan la dhigtaay
- Taan ku dhiirtayee, isku dhiibayeey
- Dhaaxaan haween, kaa dhaweystaye
- Kugu dhololoon, kugu dhaataye
- Wacadkii dhisnaa, adaa dhabar jabshoo
- Ka dhagar galoo, imaad dhigan abaal
- Qalbi dhaawacmuu, naxli biyo dhigtee
- Caashaqaan dhisnay, dhaliil uma qalmee
- Calafkii dhuftiyo, qadar baa dhignaaye
- Adoon quus dhigin, nafyahay dhiiranow.

Intaasi markaan ku idhi iyada oo aad u walaacsan ayay iigu jawaabtay.

Geedi waa runtaa wacad iyo ballan weynu wada dhiganay, ula kac aniguna uma samayn hawshan haa waan kaa qariyay in nin la I siiyay, waxaan islahaa geedi ayaa kuu soo geed fadhiisan, ninkan la i siiyay anigu kuma qanacsani mana calman adigaan ku jecelahay niyadda maxaad isaga xumaynaysaa qaali isdaji.anigu markasta garabkaagan taaganahay.

Anigu kuguma nicin jeebkaaga oo madhan, balse macaan ilaa imika waan ku jecelahay, waalidkay waxa ay ii soo bandhigeen laba mid inaan doorto habaar ama duco. Ducadana sidaa ayaan ku doortay.

Geedi macaan anigu waan ku tabi doonaa ma garanayo sidaan ula noolaan nin aanan garanayn dabeecadiisa iyo dhanqankiisa toona.

Maankayga iyo maskaxdaydu midna ma joogo waan maqanahay, muddo markii aan ka soo maqnaa reerkii ayaa la i tabay warkaygiina la helay waxaa la ii soo diray farriin ah in la ii dhisayo gabadh aan ilmaadeer nahay.

Goor galab ah ayaan ka soo carraabay reerkii Dhudi ay deganayd anigoo u sheegay inaan niydada iyo maanka ku hayn doono inta noloshayda ka dhiman farxad iyo badhaadhe ay ku noolaato iyaduna.

Waxaan habeenkii oo dhan soo guurnaba reerkii ayaan soo gaadhnay xilli danbe oo la kala seexday, ninkastaaba dhinaca ayuu dhulka dhigay anigase hurdo wey ii iman wayday.

Maskaxdayda waxaa ku soo noqnoqonayay xasuustii haldhaadii haweenka aan ka calmaday.

Subixii waxaan ku waaberiistay nabad iyo caano kadib, waxaan isu diyaariyay inaan shaqada taala dhankayga aan ka qabto, inkastooy noo irmaanaayeen dhawr halaad gorofka geela ayaan qaatay si aan u maalo.

Waxa aan wada kulanay tolkay oo iyagu arrinkan diiradda ku hayay, beri hore ayaa waxa jirtay xurguf dhexmartay reerka aan ka soo jeedo iyo reerka ay ka dhallatay Dhudi, laakin midkaayana ma oga sheekadan.

Dhinacayga midig waxaa fadhiya odey adeerkay ah isaga ooy jawigiisa ka muuqato cadho saaid ah ayuu igu yidhi "adeer dhiig iyo uustoona ma lihid miyaa? ma reerka sidaan ogayn inoo galay ayaa gabadh aadka jeclaatay tola'ay ahey ah.!!" Waxaan u sheegay inaanan war iyo wacaal toona ka hayn.

Ugu danbayntii waxaa go'aan lagu gaadhay in la Ii dhiso canbaro oo ilma adeer aanu nahay, sidiina waxaan kula aqal galay canbaro.

Dhudi qalbigayga waan ka saaray si aan u ilaawo xasuusteedii, si kadis ah ayaan maalin isaga soo hor baxnay, iyadoo biyo dhaan u timid inkastoy dadka biyaha dhaansanaya iyo xooluhu aad u badnaayeen.

Hooyo ayay noqotay oo way isbeddeshay, diifta iyo daranyada ka muuqatana ma malayn kartid dhabarkana waxay ku xanbaarsantahay ilmo yar.

Geedi; Dhudi sideed tahay walaal xaalkaaga iiga warran.?

Dhudi; waan wanaagsanahay walaal geedi ii warran adigu , reerihii sidee lagu ahaa.?

Geedi; waa lagu wanaagsanaa walaal masha-Allah maxaa kugu dhacay miyaad xanuunsatay, ?

Dhudi; walaal xaaladeydu xanuun way ka wayn tahay geediyoow aan is waraysanee dhinaca dhagaxa ina fadhiisi.?

Markay intaa igu tidhi runtii waan ka naxay waxaan ka qaaday allaab culus ooy waday waxaana fadhiisanay dhagax wadada cidhif kaga yaala.

wajigeeda waxaan ka dheehanayaa murugo aad u balaadhan, waxayna ii billowday hadalkeedi.

Geedi walaal waad ogayd inaan anigu ahaa gabadh kujecel,waatise reerkayagu I siiyeen inan maal leh.muddo markaan ahaa xaaskiisa uur ayaan u qaaday dharartuu ogaadey inaan uur u leeyahay ayaa ugu danbeysay reerkiisa.

Waan dhibtooday oo dhafoorkayga dhibaatada ka muuqataa waa mid uu ii gaystay isagu reerkayagiina way I dayriyeen oo wax taakulayn iyo taageero midna kama helin.

Waxaan u tagay islaan ii Eeddo ah oo reerkaas sheeda ka soo muuqda deggan, iyada ayaa i baxnaaninaysay ilaa intaan ka umulayay wiilkayga muumin oo wax yar uun uga dhimantahay afartan bixiisii.

Waan ka qoomameynayaa inaan adiga kula wadaagi waayo nolosha sababtoo ah waxaan ogahay in aad adigu nolosha farxad aad I siin lahayd.

Geedi maalmo madow ayaan madaxa la galay markii la isiiyay ninki, markaan ummulay ka bacdina waxay ii sheegtay islaantii ii Eedada ahayd intaas in ka badan inaanan la sii noolan Karin.

Noloshayda wax ii danbeeya garan maayo ma waxaan ku sii jiri doonaa godadkan madow mise farash khayr qaba ayaa ii bilan doona.?

Markay intaas igu tidhi jidhkayga jidhiidhico ayaa ka kacday aad ayaan uga damqaday xaaladda xun ee ay ku sugantahay Dhudi, waxaanan go'ayga kaga tiray illin ka da'aysay niyadda ayaan u dhisay inaan anigu garab taaganahay ayaan u sheegay .

Biyihii ayaan ceelkii uga dhaamiyay kadibna u sheegay inay ii raacayso gurigayga halkaasna ay ku noolaandoonto, inkastooy iga diiday inay i raacdo balse ugu danbayntii way i ogalaatay.

Waxaan hoggaanka qabtay awrkii dhaanka ahaa intaan jidka soconaywaan is wareysanaynay, iyadoo mararka qaarkood igu soo tuuraysay hadalo sarbeeb ah, oo ay uga jeeddo gabadh aan guursaday ooy maqashay warkeeda.

Reerkii ayaan soo gaadhnay, waxaa iga soo hor baxday canbaro una sheegay inay u soo dhigto gogol aan ku fadhiisano ardaaga.

Way yaabtay canbaro!! intaa iyada oo hoosta ka eegaysay Dhudi, ayay noo soo dhigtay darmo wayna salaantay.

Kadibna biyihii iyo heeryadii awrka saarnayd ka dajisay awrkiina ku dabartay geed.

Caano lis ah ayay noo keentay, maskaxdeeda waxaa ka dhex guuxaya su'aalo farabadan waxay is waydiinaysaa naagtan aad maqli jirtay waxay geedi ku samaysay muxuu maanta u soo kaxaystay.? Malaha wey isku soo noqdeen!!

Waan soo kacay markaan dareemay xaaladu inayna wanaagsanayn waxaana u yeedhay canbaro. Hadalkiiba iyada igala soo hormartay iyadoo igu leh "miyayna naagtani ahayn naagtii ku xumaysay ee ninka kaa raacday.?

Ma bilaa dhiig ayaad tahay markaad aqalkaaga keenayso?, Waan u dajiyay xaalka waxaana u sheegay qof haduu ku xumeeyo in la wanaajiyo soomaalidu waxay ku maahmaahdaa "nin sun ku siiyay subag sii"

Haddii aad rabto inaad ka aar gudato qof ku xumeeyay aar gudashada ugu wanaagsan waa adigoo qofkaasi u muujiya wanaag iyo kalgacayl maaha in aad dhib kale ku sameeyso sababtoo ah taasi ayaa ugu filan

.Sidoo kale warkii waxaa uu gaadhay tolkay iyaguna hadalo gurracan ayay iila yimaadeen balse waan ku qanciyay in Dhudi ayna ahayna qof xun balse reerkoodu uu yahay dad xun oo waliba iyada xumaantaasi u gaystay.

Wakhtigii ay joogtay gurigayga aniga iyo canbaro waxaan u muujinaynay inaan garabkeeda taaganahay.

Muddo sanad ah kadib waxaa yimid reerkoodii iyagoo iga raali galinaya wixii qalad ahaa ee ay igu sameeyeen, waxay xaal iyo xumayn ii siiyeen Dhudi inay noqoto xaaskayga labaad.

Dhudi way ku faraxday warkaasi wanaagsan wayna soo dhaweysay, inkastooy Canbaro ka masayrtay oo ay ka duday reerkeedii, ugu danbeyntii way soo laabatay iyadoo ku qanacsan Dhudi.

Labadaydii xaas waa Dhudi Iyo Cambaree waxay ku wada noolyihiiin farxad iyo heshiis .

DHAMMAAD

3

QADAR DHACAY CANAAN MALEH.

Noloshu maalin waa farxad maalina waa murugo, maalin waa qayrkaa akhriste maalina waa adiga , waa hadhka labadiisa galin

Mukhtaar iyo Ayaan waa lamaano jacayl dhab ah uu ka dhaxeeyo, midba midka kale ayuu ku dhaataa, sida qorrax iyo dayax, ayay nuurka u kala qaataan dhaayahoodu qalbigoodu waa mid qudha, midkastaaba waxaa uu ka damqadaa ka kale dhibta soo gaadha, halka ay isla qayb sadaan farxadda iyo guusha mid kood u soo hooyata,

Jacayl kalsooni ku dhisan weeye, xiisaha iyo xasuustu waa mid joogto ah had iyo jeer, wakhtiyada ay kala maqanyihin way is tabaan wayna iska war Hayaan wayna isu wal-walaan midba midka kale ayuu waydiiyaa hawsha uu hayo iyo waxa uu qabanayo.

Dhallinyaradu aad ayay ugu sheekaystaan oo hadal hayntoodu waa mid saamayn weyn ku yeelatay bulshada ay ku dhexnoolyihiin, mararka qaarkood aflagaado iyo cay ayay kala kulmaan bulshada. Halka qaar dhallinyaradu ay hiigsadaan quruxda noloshay wadaageen .

Waa laba wada dhigatay axdi aan dumayn iyo shuruuc bar kulan u ah jacaylkooda, oo midi hadii uu mid ku qaldamo xeerka u yaala ayaa lagu qaadaa. Halka mararka qaarkood marka uu mukhtaar qalad sameeyo ay ka khafiifiso Ayaan ciqaabta .

Wakhtigii ay wada dhigan jireen dugsiga waxay ahaayeen laba arday oo aad u dadaal badan, waxaa u dhaxeeyay tartan aad u adag. Ayaan marka ay ka badiso tartanada iyo dhibcaha imtixaanka wuu u hambalyayn jiray mukhtaar iyaduna sidoo kale.

Goobaha qaayaha iyo qiimaha leh waxay u ahayd caado inay tagaan maalmaha ay fasaxa ka yihiiin waxbarashada. galabtii markay cadceedu sii dhacayso waxay u dalxiis tagi jireen dhinacyada magaalada oo ay ku yaalaan beero dhirta ka baxdaa dhaayahii bogtaa ay aad ula ashqaraaraan.

Waa laba qof oo iyagu isku mashquulay way wada kaftamaan qosol iyo Dhoolo caddayn waa astaan gaar u ah labadooda. Marar ka qaarkood haddaad u fiirsatid hadalada ay ku hadlayaan waa kuwa ku salaysan dareen jacayl oo dhab ah iyo weedho xoodaamiya kashooda xubigana barbaarsha.

Midiba midka kale ayuu dhegta u dhigayaa inta uu hadlayo haddii shimbir ku soo dul degi lahayd ma ay dareemeen shanqadheeda xeel dheerida iyo heerka uu gaadhsiisan yahay jacaylka samaanta ku kobcay.

Waxbarashada dadaalkii ay ugu jireen wuu sii laban laabmay, kaliya jacaylku muuna mashquulin, waxay wada akhristaan duruustii ay soo dhigteen sidoo kale laylisyadii loo soo diray ayay si wadajir ah uga shaqeeyaan.

Waxay gaadheen heer jaamacadeed mukhtaar waxaa uu noqday dhakhtar, halka Ayaan iyaduna ay noqotay injineer, waxay galeen jawi kaduwan kii hore waxay ku soo barteen iyadooy kala duwan yihiin waaxyaha ay bartaan hadana sidii wakhtigii dugsiga ayay isu caawiyaan.

Ilbidhiqsigii wuxuu isu beddelay daqiiqad daqiiqadi waxay isu beddeshay saacad, saacadii waxay isu beddeshay maalmo, maalmihiina waxay isu beddeleen bilo, bilihiina waxay isu beddeleen

Sanad, sanadkiina waxa uu isu beddelay sannado. waxaa la gaadhay wakhtigii ay jaamacadda ka qalin jabin lahayd iyadoo soo baranaysay muddo shan sano ah, mukhtaar waxay ka horreysaa laba sano.

Waxay isu diyaarisay qalin jabintii jaamacadda siday uga qayb gali lahayd waa maalin ay aad u sugaysay inuu alle ku simo. Suuqa ayay tagtay waxayna soo iibsatay labisyo kala duwan oo ay ugu talo gashay munasabadda qalin jabinteeda.

Mukhtaar isaguna waxaa uu ku mashquulay sidii uu ugu gayn lahaa jeexiisa hadiyado maadama ooy ahaayeen lammaane barkhad iyo badhaadhe wadaaga.

Waxaa ka soo qayb galay xafladda qalinjabinta Ayaan qoyskeeda, qaraabada iyo dhammaan asxaabteeda oo uu hormuud u yahay mukhtaar,

Hoolkii qalin jabinta ayaa la galay ardaydii waalidiintii asxaabtii iyo marti sharaf kale oo lagu soo casuumay. Hambalyada ayaa iska daba dhacaysa, way isu wada hambalyeynayaan ardaydu.

Waxaa la soo gaadhay goortii la guddoon siin lahaa ardayda kaalmaha ugu horreeya ka gasha jaamacadda.

Waxaa laga codsaday qaar kamid ah martida inay guddoon siiyaan abaal marintii ay mutaysteen ardayda kaalmaha ugu horreeya gashay.

Garaaca wadnaha ardayda waa mid saaid u garaacmaya qof kastaa waxaa uu is weydiinayaa ayaa kaalinta koobaad labaad iyo saddexaad galaya?, haddaad jaamacadda dhan kaalmaha ugu horreeya ka gali waydo Malaga yaabaa inad fasalka kaalinta koobaad ka gasho.?

Waxaa la bilaabay in lagu dhawaaqo dhammaan ardayda kaalmaha ugu horreeya galay. Ayaan ayaa noqotay gabadhii ugu horaysay ee jaamacadda hal mar ka wada gasha laba kaalin, waa mar waxay gashay kaalinta koobaad ee dhammaan ardayda jaamacadda dhigata, waa marka labaade waxay kaalinta koobaad u gashay fasalkeedii.

Hal mar waxaa is qabsaday mashxarad sacab iyo foodhi. waxay u soo dhaqaaqday in la gudoon siiyo abaal marintii ay mutaysatay. Wayna ka gudoontay.

Mukhtaar qofkii ugu horayay ee ugu hambalyeeya guusha lama filaanka ah ee ay soo hoysay ayuu ahaa. Sawirro xasuus ah ayay Ayaan la gashay macalimiinteedii ardaydeedii qoyskeedii iyo asxaabteediba dhaammaan.

Wakhtigii qadadu markii ay gaadhay ayaa lagu soo kala dareerey xafladdii iyo jawigii aadka u macaanaa,waxaana loo soo galbiyay Ayaan dhankaas iyo xaafadoodii.

Cuntooyiin kala jaad jaad ah iyo cabitaanba kadib, waxaa dhammaatay munaasabadii guriga loogu dhigay Ayaan, in muddo ah waxay noqotay qof la hadal hayo guusha ay soo hoysay.

Wakhti yar kadib nasiib wanaag waxay heshay fursad shaqo oo cilmigii ay soo baratay ah, subax walba waxay ku kalahdaa shirkad aad u weyn oo ay ka hawl gasho. Mukhtaar sidoo kale hal sano ayaa ka xiga inuu dhammaysto jaamacadda

Jacaylkoodii wuu sii laba jibaarmay waxayna go'aan ku gaadheen inay is guursadaan wakhtiga uu waxbarashada dhakhtarnimada soo dhammeeyo dabadeed.

Maanta waa farxadii Ayaan soo martay mid ka duwan, oo qalin jabintii mukhtaar sadex cishaa ka dhiman. Diyaar garow waxaa uu ugu jiraa xafladda qalin jabinta qoys qaraabbo iyo asxaab way sugi kari laayiihiin qalin jabinta dhakhtar mukhtaar.

Suudh qurux badan ayuu ku soo labistay waxaana la soo galay hool kii loogu talo galay xafladda. waxaa ka soo wareegay laba sano maanta oo kale markii guul aan la filanayn soo hoysay ayaan xasuus gaar ah ayay u tahay.

Sidii caadada u ahayd waxaa lagu dhawaaqay ardaydii kaalmaha ugu horreysa gashay laakin nasiib xumo kuma jiro ardayda si guud jaamacadda kaalmaha ugu horreeya soo galay.

Wadnaha farta ayay ku haysaa Ayaan iyadoo fajacsan ayaa lagu dhawaaqay magaca mukhtaar isagoo kaalin koobaad u galay fasalkiisa. Waxaana la gudoonsiiyay abaal marin.hal mar waxaa is qabsaday sawaxan aad u weyn.

Hadiyado iyo waxyaalo badan oo ay ugu talo gashay ayay gudoon siiyay Ayaan mukhtaar. Sawiro xasuus ah iyo hambalyo aan kala joogsanayn ayaa soo gaadhaysa mukhtaar.

Muddo kadib mukhtaar waxa uu helay shaqo oo dhakhtarka guud ayuu ka hawl galay, waxay ballameen habeen way casho tageen kadib Ayaan oo ka walaacsan inuu diido mukhtaar codsi ah inay is guursadaan balse mukhtaar oo dareensanaa ayaa ku yidhi;

- Dadka kaaga eexdee
- Ma abaal gudaysaa
- Nafta kugu ilaawee
- Ma ilaashanaysaa.?

Waxay uurka ku haysay ayuu u soo bandhigay markaasay ugu jawaabtay;

- Ragba kaa inshaartow
- Ma i dhawranaysaa
- Aniguna ku aaminee
- Ma i guursanaysaa.?

Wuxuu ugu jawaabay;

- Odhaahdaan jalbeebshaan
- Ku asteeyay guurkii
- Ifka noloshu waa adi
- Ogolaaday maanta ba
- Udgoon aqal galkeena

Waxaa la gudo galay hawshii ahayd in seeska loo dhidbo guri kalgacayl aad uweyn oo geedigii jacaylka muddada dheer soo rarnaa lagu furo .

Mukhtaar waxaa uu u sheegay in maalinka axadda uu soo doonayo Ayaan sidaana xaafadda ugu sheegto.

Way ka aqbashay xaafaddii ayay u sheegtay waxaa la isu diyaariyay hawshii, saddex cisho ayaa ka xigta runtii way sugi kari la,ayihiin.

Maalinkii axadda markii laga baxay salaaddi subax Mukhtaar iyo tolkii waxay u soo geed fadhiisteen in la siiyo Ayaan waa la siiyay wayna ka guddoomeen, waxaa lagu meheriyay masaajid jaar la ahaa guriga Ayaan.

Mukhtaar waxaa uu qaaday xil aad u culus qoyskii iyo qaraabadii gacalkii ayuu bartay ayaana soo kale.

15 cisho oo fasax ah ayay shaqadoodii ka soo qaateen, waxay isu diyaariyeen inay ku soo todoba baxaan caasimadda wadanka. wakhti fiican oo ay soo wada qaateen waxaa dhammaaday muddadii shaqada ay fasaxa ka ahaayeen.

Mid waliba waxaa uu dib u bilaabay shaqadiisii jacaylku wuu ka sii siyaaday sidii hore waxay sugi kari layihiin inta ay guri wada degi doonaan cadceeduna subax walba u soo bixi doonto iyagoo is weheshanaya.

Wakhtigii mukhtaar uu hooysan lahaa xaaskisii Ayaan ayaa la gaadhay, guryihii iyo dhammaan waxyaalihii loo baahnaa ayaa la diyaariyay.

Aroos laysku arko dad muddo fara badan kala maqnaa ayuu noqday, ducadii rasuulka NNKH ee arooskaa loogu ducaynayey ayaa loogu ducaynayaa, mashxarada, buraanburka iyo waxyaalihii kale ayaa lagu mashquulsanyahay arooska.

Aroos laguma raago lamgamana raagee waxaa la soo gabo-gabeeyay xafladdii lammaanaha caashaqa xidiga iyo xidigta. Habeeenkii raaxadii alle ugu talo galay ee xalaasha ahayd ayay guteen, subixii saladdii markay wada tukadeen kadib Ayaan waxa ay gashay hawshii madbakha oo waxay xaajigeeda u diyaarinaysaa qureecdii. Sababtoo ah u ma joogto gabadh shaqaale ah markii ay u diyaarisay qureecdii ayay suuliga u dhigtay biyo diirran . saabuun iyo tuwaal, way soo kicisay iyadoo leh qaali kac wakhti ma haysano shaqaa ina sugaysee "hurdo habarba korin weydee ma anay hilbo I galin" inta uu yidhi ayuu soo kacay kadibna suuliga galay soona qabaystay.

Midba dhinac ayuu ka soo fadhiistay miiskii cuntada oo qureecdii ku diyaarsan tahay waa la qureecday kadib Ayaan waxay u soo labisatay shaqadeedii dharkii ugu quruxda badnaana waxay u soo diyaarisay gacaliyaheedii.

Goor sheegtu markay ku beegantahay 7;30 kii subaxnimo midkastaa waxaa u yimid baskii shaqaalaha wayna is macasalaameeyeen.

Aroor waxaa u bariday farxad iyo jawi ka duwan kii keli nimada ahaa. wajiyadooda waxaad ka dheehanaysaa farxad iyo Dhoolo caddeyn saaid ah markii uu ka soo rawaxay shaqada mukhtaar ayaa waxa uu la hadlay xaaskiisii una sheegay inuu qadada huteelka uu ka soo qaadeeyo gurigana ay isugu yimaadaan.

Ayaan gurigii bay ka hortimid,biyo uu ku maydho iyo salligii si uu ugu tukado salaadda duhur oo afka lagu hayay ayaay u diyaarisay,

Mukhtaar ayaa yimid gurigii, waa Ayaan oo ku labisan dhar aad u quruxbadan soona jiitay indhaha mukhtaar qaali soo dhawoow waad soo daashaye suuliga biyo iyo saabuun ayaan kuu dhigaye isa soo qabooji ayay ku tidhi, kadibna waxay sii diyaarisay qadadii uu hotelka ka soo iibiyay.

Suuliga ka soo bax, soo weysaysay, salaaddi duhur ayay tukadeen, kadib miiskii qadada ayay soo dul fadhiisteen, iyagoo aad u faraxsan ayay wada qadeeyeen.

Maalmo qiimo iyo qaayo kulahaa noloshooda ayaa laga sheekaysanayaa, sidii la isu agfadhiyay ayaa waxaa la gaadhay goortay ku noqon lahayd Ayaan shaqada oo mukhtaar gallin kali ah ayuu shaqeeyaa.

Goobtii baska shaqada laga raacayay ayuu soo gaadhsiiyay,si qurux badan ayuu u macasalaameyay,dadka jidka maraya iyo kuwa baska saaranba way la fajaceen.

Wuu soo noqday, mukhtaar badanaa wuxuu xiisayn jiray wararka caalamka,ciyaaraha. Iyo akhriska kobcinta nolosha shakhsiga ah.

Ayaan shaqadii ayay ka soo laabatay iyadoo aad u daallan ayay gurigii timid, waxayna u sheegtay inay xanuunsanayso.islamarkiba wuxuu kula orday dhakhtarkii uu ka shaqeynayay.

Baadhitaano kala duwan oo lagu sameeyay ugu danbeyntii waxaa loo sheegay inay dhiikar leedahay iskana ilaaliso waxyaaba ku kicinaya . cuntada ay ka yarayso milixda badan.

Dhakhtarkii ayuu ka soo celiyay, gurigii ayuu ku soo laabtay. wuu xanaaneeyaa, shaqadiisii ayuu ka soo fasax qaatay iyada darteed wehel ayuu u yahay,.maalmo kadib wey caafimaadey labadoodiiba shaqadii ayay kulaabteen.

Habeen habeenada kamid ah, ayay isu raaceen hotel si ay u soo wada casheeyaan, waxay jeclaatay inay u sheegto war farxad ah, balse si ay ugu sheegto ayay garan wayday, ilaa ugu danbayntii ay ku guuleysatay inay uur u leedahay Dr. Mukhtaar.

Farxad iyo rayn rayn ayay u ahayd mukhtaar.habeenkaas waxa uu suuqa uga soo iibiyay hadiyado uu kaw ka yahay buug ka hadlaya maareynta lammanaha.

Muddo yar kadib, Ayaan waxaa uu ku war galiyay maadama ay uur leedahay inay ku xidhnaato xanaanada dhakhtarka ilaa inta ay ka umulayso .

Jacaylkoodii wuu ka siisiyaaday halkii hore, sagaalkii bilood ee uurka dhawr cisho ayaa uga dhiman.

Mukhtaar oo habeen ku jira shaqada dhakhtarka ayay la soo hadashay una sheegtay inay fooshii hayso.

Si degdeg ah ayuu ugu yimid isagoo ambulance wata, dhakhtarka ayuu geeyay dhawr saacadood kadib wuxuu u sheegay inaanay fooli hayn, xaafaddana ay ku noqonayaan.

Nabad iyo caano gurigii ayay ku soo noqdeen habeenkii waasan ayaa u baryay, goor sheegtu markay ku beegnayd afartii galabnimo fooshii ayaa qabatay wuxuu geeyay dhakhtarka wuxuuna la hadlay walaashii ka yar si ay u caawiso Ayaan oo dumashideed ah.

Dhawr saacadood markii ay foolanaysay ayuu waydiiyay dhakhaatirtii ay wada shaqeynayeen iyagoo niyada u dhisaya ayay ku yidhaahdeen way fiicantahay, maadama uu bartay cilmiga caafimaadka wuu gartay inay dhibi jirto oo fooshii ku dheeraatay.

Waa loo yeedhay waxaana loo sheegay in lagu qalayo ilmaha, sidaa daraadeedna uu saxeexo warqaddan, warqadii saxeex wajigiisa waxaa ka muuqda murugo iyo niyad jab aad u weyn .

Daqiiqado kadib waxaa uu maqlay laba mataana ah waa wiil iyo gabadh oo ooyaya, markaasuu inta dhanka qaybta dhalmada u soo dhaqaaqay waydiiyay kalkaaliyashii miyay dhashay gabadhu.

"Haa doctor waa lagu guuleystay qallinkii oo laba carruur mataano ah ayay dhashay dhamaantoodna way wanaagsan yihiin" ayay ku tidhi mid kamid ah kalkaaliyaashii.

Markaasu yidhi;

- Qaninimadu waa
- Adoo ubad qurxoon
- Qalanjo kuu dhashee
- Qaadir mahadiiye
- Ma qiyaasi karo
- Qiimaha farxada
- Qalbigayga taal.

Wuu nafisay isla markiiba, wuxuu isu diyaariyay labada mataanaha ah magacii loo bixin lahaa. Waxaa loo sheegay inayna Ayaan xaaladeedu wanaagsanayn, wuxuu dul yimid sariirtii ay ku jiiftay wuuna dul fadhiistay, dhabtiisa ayuu ku qabtay madaxeeda.

Wax kala garasho ah maleh, isagana murugo aad u weyn ayaa ka muuqato jacaylkiisa ma awoodo wax uu u qaban karo, balse ducada iyo quraan ayuu ku akhrinayaa, in door ah markii uu quraankii ku akhriyay taxaliil masaajidka looga soo dhigayna yara kabatay way soo dhaantay sidii hore wax yar.

Way ashahaadanaysaa oo way la dardaarmaysaa iyadoo ku leh "huuno mukhtaar haddii wadka Eebbe i helo adigaan kugu ogahay carruurteena naftaadana ii ilaali iskana kay saamax anigu aduun iyo aakhiraba mid ku jecel ayaan ahay,e".

Wuu ilmaynayaa mukhtaar, wuxuuna u sheegay inuu alle caafimaad siin doono inshallah carruurtana uu daryeeli doono, iyada oo ashahaadanaysa ayay naftii ka baxday goor laga soo baxay salaaddii cishaa'i.

Mukhtaar waa habeen uga duwan habeeno badan oo farxad ay Ayaan wada qaybsadeen, wuxuu wayay middi qudha ay iska eeganayeen adduunka wuxuu xasuustaa hadaladeedii ugu danbeeyay ay ku lahayd, waxaa loo dareeray sidii loo soo aasi lahaa maydka, xabaashii ayaa la qodey, kadibna maydkii ayaa la soo qaaday mukhtaar hareeraha waxaa ka socda dhakhaatirtii ay wada shaqaynayeen.

Iilkii ayaa lagu soo rogay dadkii oo dhana way ka soo noqdeen xabashii, mukhtaar iyo saddex ay asxaab yihiin ayaa ku hadhay xabaalihii, Mukhtaar iyo saaxibadii waxay u duceeyeen in Alle naxariistii jano ka waraabiyo xaaskiisi Ayaan, inta anay soo dhaqaaqin ayuu isagoo murugaysan yidh;

- Qalbi aad dagtaan
- Abid quusan Karin
- Qadar dhacay markii
- Qabri aad gashuu
- Gabal ii qab yidhi

- Qiiroodayeey
- Maxaan qaban karaa?

Ciyaalkii waxaa u korinaysa walaashii ka yar waa laba mataano ah, Marwaan iyo Marwo ayaa loo kala bixiyay, marwa waxa ay u eegtahay hooyadeed Ayaan oo mukhtaar inantiisaa markuu arko waxa uu xasuustaa hooyadeed Ayaan, ugu danbayntii waxaa uu la dardaarmay carruurtiisa una sheegay inuu hooyo iyo aabbo u noqon doonto, dardaarankii carruurtiisa uu kala dardaarmayay ayaa sidan ahaa;

- Middii idin soo dihatey
- Hadduu wad diley dorraato
- Qadarka daayin baa nagaan'e
- Waxaan idin kula dardaarmay
- Dadaalkiinu yuu yaraanin
- Hankiinuna yuu duugoobin
- Samirkana yaan la daynin
- Daryeel anna waan hurayaa
- Guushana waa la heli doonaa.

DHAMMAAD

4

AXDI MALEH RAGGU JACAYLNA WAA IBLAYS.

Dhulka waxaa hadheeyay roobkii dayrta. Balliyada waxaa buux dhaafiyay xareeddii roobka, dhirtu way magooshay, dadku wuu wada riyaaqsanyahay, oo qaarkood waxay falanayaan saracyo kala duwan, halka qaar saracii ugu horreeyay uu u soo go'ay, xooluhu way wada dhaleen oo waxaa la dhamaa dambarka, barwaaqo darteed subaggaa lagu dhaashadaa, baarqabka geelu wuu doobiyaa dhalintu waxay ciyaarayaan ciyaarihii hidihii iyo dhaqankii soomaalida, xayawaanka kiisa bilicda leh waxaa aad arkaysaa iyagoo banaanka boodboodaya, indhahaagu waxay qabanayaan Daa'uus ugbaad fadhiya. Ruhuna cidiisa wuu durbaanshaa, geenyo shaaximan haddana doog lagu shakaaley ayaad arkaysaa.

Ugu danbayn markaan soo ambabaxay waxaa laygu soo sooray marti sooryo soomalidu leedahay ee aan sal guurin. Waxay igu sagootiyeen qubme subag ah, Sibraar caano dhay ah, aale sonkor iyo xasiid bislaatay, isla subaxii aan ka soo baxayay waxay ii muujiyeen qalbiyo xaadhan iyo wajiyo ay ku dhigantahay kalgacayl iyo farxad.

Waxaan gaadhiga soo raacay anigoo ka qiirooday ka soo ambabixidda dadkaa qalbigayga saamaynta ku yeeshay oon marnaba ilaawi Karin.

Intaan dhexda ku soo jiray, waxaa qalbigayga ku laba kaclaynayay wanaaggi ay ka shayda ku beereen. Ugu danbayn markaan is hayn kari waayay waxaa ishayda ka burqanaysay illin anigoo muraaqaysan ayaan gacantayda middig iskaga tiray, niyadayda waxaan galiyay inaan wakhti badan la qaadan doono, kuna dhaqmi doono carbinta anshaxa iyo dhaqankeena waanagsan een ka soo bartay.

Wakhtigii fasaxa aan ahaa ayaa dhammaaday waxaan dib ugu soo noqday magaaladii, oo Sanad dugsiyeedkii ayaa bilaabmay aan kaga mid noqonayay ardayda dugsiga, Waxaan xidhay xijaabkii iyo goonnehii billicda samaa oo astaan u ahaa dugsiga.

Xiiso gaar ah ayaa ii hayay, oo aan uqabo dugsiga maadama aan dhammaystay wakhtigii fasaxii een miyiga joogay , dugsiga waxaan wax ka wada baranaynay arday ka kala timid gobolada iyo degmooyinka, waxaan la kulmay dhallinyaro badan oo ka kooban gabdho iyo wiilal, waxaan ka kasbaday meesha saaxiibo badan oo sumcad wanaagsan leh, duruustii ayaa bilaabatay oo horay aqoon aan lahayn iyo wax nagu cusubba, waan kala kulanay waxbarashadii.

Dhanka waxbarashada waxaan kamid ahaa ardayda ugu horaysa fasalka hormuudkana u ah, barayaashu way iwada jeclaayeen, waxaana ahaa horjoogaha fasalkayga waxaan had iyo jeer ku maansoon jiray sidan;

- Aqoon waa tamar
- Toosh iyo ilays
- La tiriigsadoo
- Waa toolmoonida
- Tusmadeeda nolol
- Lagu tiigsadiyo
- Han tisqaadayoo
- Lagu taxay xariir.

Waxaa ila dhigan jiray fasalka gabdho curdin ah, oo markaas soo kacay, subax walba waxay ka sheekaysan jireen jacayl iyo hebel xalay saa iyo saa buu igu yidhi, anigu waxay ka sheekaynayaan waan la yaabanaa!!, maalin maalmaha kamid ah ayaan arkay anigoo fasalkayga ku jira, fasalka igu xiga oo markaa wiil markaan arkay, laabtayda aan ka dareemay kulayl, balse iskuma sii mashquulin oo waan is ilowsiiyay.

Sidii bay gabdhihii asxaabtaydu jacayladii subax walba ugu sheekaystaan, aniguna war moog ayaan ahay, Waan iska dhex fadhiyaa, casharkaygaan ku mashquulaa, fasalkii ayaan ka gudbay, una gudbay fasalkii ku xigay, dhammaan dugsiga caan ayaan ka ahaa, oo waxaa laygu bartay barnaamijyada subaxii oo aan si wacan u soo diyaarin jiray intaan fasalada la galin horjoogana waxaan u ahaa fasalkayga, ardayda badankooda waan is naqaanay oo waxaa na kulmin jiray dadaalka aan ugu jiro waxbarashada, mar walba anoo ka soo dhexmuuqda ardayda, halka qaarkood aan iska garanaynay dusha sare.

Waxaa iska kay daba dhigtay wiilkii maalinkii hore markaan arkay aan ka dareemay laabtayda wax kulul, balse aan is dhaafiyay oo markaa isaguna u gudbay fasalka naga koreeya, meel walba oon taaganahay isaguna wuu taaganyahay, isaga iyo asxaabtiisuba way la socdeen dhaqdhaqaaqayga dugsiga.

Isaga waxaa u dheer inaan maalin walba aan uga dhex soocnahay ardayda kale, oo haddii uu kaligii yahay iyo haddii uu asxaabtiisa la socdo sigaar ah ayuu ii dhawranayay.

Haddii aanu igu arag dugsiga wuu isoo raadin jiray, run ahaanti waan la yaabi jiray qof aydaan is garanayn oo ku raadinaya marwalba, waxaan is weydiinayay inankan maxaa ka siya.? Maalmihii danbe waxaan isku arkay inaan dhankiisa u janjeedho, oo hadaanan arag aan raadin jiray siduu isba ii raadin jiray, Subaxii marka lagu jiro safka ardayda kale waxaan ka garan jiray madaxiisa markaas ayaan nafisi jiray.

Waan u adkaysan waayay dareenkan I gubaya, habeen habeenada kamid ah ayaan warqad jacayl u qoray, salaan diirran iyo kalgacayl aad u weyn ku dheehantahay waxaan sii raaciyay codsi anigoo u dhigay sidan;

- Filan waa jacayloo
- Aragtida ku faafaa
- igu ganay falaadhoo
- Igu fiday xaqiiqdii
- Fuleerkaan kuu soo xulay
- Ujeedda ku guud furan
- Ila fahan aboowoow.

Subaxii gabadh asxaabtayda iigu dhaweyd waa Iqra'e ayaan u keenay. Waxaan ku idhi; saaxiib wiilkaa baan jecelahay inaad iigu geeysaan rabaa warqadan saaxiibaday iqra aad ayay iigu qososhay iyadoo ila yaaban!! oo Dhoolo caddaynaysa ayay igu tidhi; " Aswaan iyo jacaylaa!!" taasi waxaa iiga sii daran wiilka aan u dirayo warqada magaranayo magaciisa.
"Aswaan saaxiib haye." ayay iigu jawaabtay. Warqaddii baan u dhiibay saaxiibaday waxa la socday Ubax cas.

Waa dumar oo war madaayaane, dhammaan gabdhihii aan asxaabta ahayn een subax walba ka sheekaysan jiray arrimaha jacaylka, saaka anigaa laygu sheekaysanayaa.

Waxayna ku tashadeen in warqadda loo dhiibo saaxiibaday Shamsa, oo ay isku xaafado deggan yihiin wiilka.

Ku darsoo warqadda kuma qorna magacayga iyo kiisuba, Waalli cas iga dheh!!!!. Markii la gaadhay nusasaacihii ayaa loo dhiibay warqaddii shamsa, waa taas daf la tidhi ee u dhaqaaqday dhankaas iyo wiilkii, waxay sugayeen jawaab deg-deg ah.

Laakiin wiilkii waxaa uu u qaatay gabadha shamsa ahi ee warqadda u keenaysa inay iyada lafteedu codsi ugu tahay jacayl oo warqaddu dhankeeda ka socoto.

Iska soo qaad qof wax jecel oo jawaab sugaya dareenkiisa, fasalka waxaan ka noqday maqane jooge, waxaan galayaa tartan arbaca walba dadkii aanka guulaysan jiray way iga guuleystaan, waxaan ahaa geesiyad shalay.

Maanta doqon iyo wax ka liita ayaan noqday, barayaashu way fajacsanyihiin bare walba siday wax u jiraan ayuu i waydiinayaa?, waxaan ugu jawaabayaa "macalin waxa jira xaalado i nuglinaya, oo iga hor istaagay dhiirranaantii iyo dadaalkii wax barasho ee aan ku jiray.

Wiilku sidii iyo si ka daran ayuu ii daba socdaa, maalin ayaa waxaan go'aansaday wiilkan inaan magaciisa ogaado, ina abtiday oo ay isku fasal yihiin ayaan intaan galab u tagay gurigooda, saan ugu sheekaynayay ayaan u dhexgaliyay ujeedadii aan kalahaa ee aan ugu tagay.

Anigoo caayay wiilka ayaan ku idhi "horta inaabti wiilka isla qabka weyn ee aad isku fasalka dhigataan hebelna la socda magacii." Inaabtiday; " ma wiilka jidhkiisu dhisanyahay? Akhas kaasi Yaxye ayaa la yidhaa, waa mid aan ka yaabay!".

Ma malayn kartid maalinkaas dareenkayga farxad daraadeed illin ayaa iga da'day, si hoos ahaan ah ayaan isaga tirtiray.

Maalin kaa laga bilaabbo buug walba oon leeyahay waxaan ku xardhaa midabo kala duwan oo magaca Yaxye ah .

Waa subax hore, waxaan u dhaqaaqay dukaan ku beegnaa ka soo horjeedka dugsiga, waxaan ka soo iibsaday afar warqad oo A4 ah.oo aan ugu talo galay inaan u geeyo Yaxye.

Waxaan akhriyi jiray buugaagta yar-yar ee arrimaha jacaylku ku qoran yihiin sida; geeraarrada, sheekooyinka jacaylka IWM. Waxaan soo galay fasalka iyadoo ardayda iyo macalinkiiba iga hor galeen. laba kamid ah gabdhaha aan asxaabta ahayn ayaan dhexda ugalay kursigay ku fadhiyeen.

Inta uu macalinku casharka qorayo anigu warqad ayaan u qorayaa Yaxye, warqaddii kolba mid ayaan ku qoraa markaan dhammeeyo way ila fool xumaataa waan iska tuuraa.

Markii aan marayo warqaddii afraad ayaay aad iila qurux badnaatay, Xiisadiina way dhammaatay, waxaan rabay inaan ka dabo baxo macalinka, laakin wuu ku raagay, oo macalinkii xiisadda xigta noo dhigayay ayaa albaabka fasalka soo hor istaagay una sheegay macalinkii noogu jiray inuu dhaafiyay wakhtigii xiisaddiisa.

Iimayna suurto galin inaan ka dabo baxo macalinka, sababtoo ah macalinkii xiisaddan xigta lahaa ayaa soo galay, waxaana is idhi markaad dhammeysato xiisaddan ee la idin fasaxo ayaad ugayn, nasiib darro kumaan guulaysan oo wuu iga hortagay Yaxye.

Aniga oo dareemaya inaanan ku guuleysan ujeedadii aan u qoray warqadda, anigoo niyad jabsan baan u jihaystay goob aan ka raaci jiray gaadhiga u baxa dhanka xaafadahayaga.

Waa wakhti xilli qado ah oo milicda cadceeddu aad u kulushahay, dad kuna ka soo wada rawaxeen hawl maalmeed kooda, waxaan raacay baskii oo aad u buuxsamay.

Laakiin wiil ayaa iiga daadagey oo booskiisii ayaan ku fadhiistay, anigoo u mahadceliyay wiilkii.

Waxyar kadib anigoo daalan waxaan ka degay baskii, kadibna waxaan ka tallaabay jidka xaafadda oo ku beegnayd dhinaca bidix ee wadada, gurigii ayaan galay waxaan iska bixiyay labiskii dugsiga, waxaa igu soo dhacday inay warqadii aan qorayay buugtayda ku jirto, meel aan ku aamino ayaan waayay, waxay ila noqotay wax xun inaan wato meel aan galiyo waan waayay, qiyaas ahaan dhawr jeer ayaan akhriyay .

Hooyo Fahmo waa qof ad-adag oo aad baan uga baqi jiray, armay aragtaa baa igu soo dhacday yaab!!!, Meel aan ka dhigo guriga sidaa u weyn waan ka waayay, markii danbaan is idhi nin miyaad warqadan u geyni walle bay ka tahay !!! iska dhaaf kadibna waan jeexjeexay warqadii.

Subax sabti ah oo ay taariikhdu ku beegantahay 13 may 2011kii waxaan u gudbay fasalkan ku xiga.

Wakhtigii nusasaacaha ayaan usoo baxnay, ishaydu waxay ku dhacday Yaxye Naxdin !! waan dhaqaaqi kariwayay socodkii ayaan gabay.

Faadumo oo kamid ah gabdhihii aan asxaabta ahayn ayaa igu tidhi " saaxiib ii dhiib warqaddii aan u geeyee wakaas Yaxye'e" waxaan ugu jawaabay "waan jeex jeexay" way yaabtay wayna iga aamustay fasalka ayay dib ugu laabatay.

Waxay soo qaaday warqadihi aan qoray shalay kuwii ila fool-xumaa mid kamid ah oo ay haysay ayay igu tidhi " ma aragtaa waan u gaynayaa.", "Alla Bisinka!!!" ayaan ku idhi anigoo naxsan, warqadda ay iisheegtay inay Yaxye u gaynayso.

Iyada oo Dhoolo caddaynaysa ayay ula oroday Yaxye oo ku jiray xarun lagu bixiyo lacagta dugsiga. waxayna u sheegtay inay warqaddan Aswaan u soo dhiibtay.

Meel aan joogo waan garan waayay, farxad naxdin!! Wax la dhahaa i qabsatay, habeenkii oo dhan maan seexan.

Waxaan is weydiinayay "miyuu ku diidi mise wuu kaa aqbali.?", Allow khayr ka dhig, subixii ayaan imid dugsiga anigoo baadigoobaya wajigiisa, meel ii dhaw ayuu igaga soobaxay, afkii ayaa juuqda gabay oo waan iska aamusay,.

Waxaa la gaadhay wakhtigii na laga fasaxayay dugsiga, sidii caadada ii ahayd waxaan u jihaystay goobtii aan ka raaci jiray baska taga xaafadaha aan deganahay.

Bas la'aan awgeed aniga oo jidka dhinac ka taagan ayaa waxaan dhabarkayga ka maqlay cod aad u macaan oo leh "Aswaan", waxaan soo jaleecay dhankii aanka maqlayay jabaqda codka aadka u macaan, Ishaydu waxay qabatay Yaxye oo taagan meel ii jirta dhawr talaabbo.

Yaxye: ma adaa soo qoray warqadda Aswaan.? Waxaan noqday qof hadal barad ah Eeen……Eeen…..Eeeeeen, ani ma rabin faadumo ayaa kuu keentay.

Anigoo gar-gariiraya ayaan ugu jawaabay. Isagoo Dhoolo caddaynaya ayuu igu yidhi "waan kuu soo jawaabay hoo." Anigoo naxsan ayaan ka qaatay warqaddii.

15 may 2011 ayay ku beegnayd taariikhdu goorsheegtuna waa 12:30 duhurnimo jidku waa cidhiidhi, milicda cadceeddu aad ayay u kulushahay dhididka iga da'aya waxa uu qooyay xijaabkayga kulayl aad u daran awgeed, waxay ii ahayd masaafo aad iigaga dheeraatay intay Ii jiri jirtay xaafadu.

Aniga oo dhibsanaya socodka gaadhiga ayaan waxaan soo gaadhay xaafadii, sidii caadada ii ahayd waxaan iska beddelay dharkii dugsiga kadibna waan soo weysaystay iyadoo laga baxay salaaddii duhur.

Waxaan soo galay gurigii oon dhigtay salli aan ku tukanayay. walow maalinkaas aanan ogayn saan u tukaday ALLE hayga aqbalee. Warqaddii ayaan kala soo baxay boorsada buugta aan ku rito.

Waxaan waayay meel aan ku akhriyo warqadan oo hooyaa joogtoo igu leh "hooyo Aswaaneey kaalay qadee, qadadu yay kaa qaboobine.", "Hooyo waan soo socdaa" ayaan dhawaq dheer ku idhi. hareeraha anigoo iska dhawraya ayaa warqaddii jikada la galay, si aan ugu akhriyo. anigoo ka cabsanaya in laygu arko hoosta waxaan ka xidhay madbakhii.

Warqadii ayaan kala bixiyay. waxaana ku xardhan far aad u qurux badan oo midabo kala duwan lagu xardhay suugaana lagu ladhay.

- fad hilaaciyo
- dhirtoo fiishaay
- faxane miduu
- fiicnida dadnimo
- ugu fooladaay
- fal yatafadal
- qalbi kuu furan.

Waan la dhacay weedhaha ku qoran warqada oo aad ayay ii soo jiidatay, muddo yar kadib waxaan fursad u helay inaan qaato mobile X2 ah oo markaa socday.

Halkaasi waxaa ka sii xoogaystay jacaylkii iyo xidhiidhkii oo waxay noqotay inaan wada xidhiidhno, waxaa caado noo noqotay inaan wada hadallo wakhtiyada ka baxsan waxbarashada sida; barqada hore ee subixii iyo waliba habeenkii, markaan seexanayno, Magarankaro wakhtigaasi dareenkaygu siduu ahaa Farxad awgeed.

Waxaan ku kulmi jirnay goobo noo cayiman kulankii waxaa uu noqday mid joogta ah, Yaxye waa wiil ilaahay uu siiyay qurux iyo haybad uu kaga suntan yahay dhallinyarada faciisa ah.

Aad waxaa uu u sharfaa hablaha mararka qaarkoodna waan ka xanaaqi jiray markaan arko isagoo arrimahaas ku mashquulsan.

Wakhtigaan kuwada hadlayno aleenka (telephone) ka, waxaad moodaa inuu dareenka jacayl een u qabo aad u sii badanayo, anigoo illaaway hawlihii aan lahaa laygana baahnaa inaan qabto.

Sida dugsiga oo aan illaaway casharradii iyo dadaalkii joogtada ahaa, waxaan noqday gabadh ka fikirta Yaxye oo waxaa isaaqay jacaylka aan u qabo isaga.

Ardayda badanaa waxaan isku baranay tartamada, iyo goobaha wax lagu akhristo, balse goobahaasi oo dhan waan ka caagay .

Wehelkaygu waxaa uu noqday Yaxye noloshaydii oo dhanna waxay ku soo koobantay isaga, mararka qaarkood waxaa la i su'aalaa maxaa kugu dhacay miyaad xanuunsanaysaa?, Xaalku se xanuun iyo wax la mid ah wuu ka awood weyn yahay!!.

Waxaan is dhaafsan jirnay hadiyado kala duwan, farraanti iyo ubax cas, waxay ahayd hadiyaddii ugu horreysay een guddoonsiiyo jacaylkaygii Yaxye, halka isaguna uu ii hadiyadeeyay hadiyad qaali ah . Inkastoon ku odhan jiray adigaa hadiyad iigu filan, waxaa caado noo ahayd inaan isu soo raacno dugsiga oo waxa uu igu soo mari jiray xaafadda.

Wakhtiga nusasaacahana waxaan kuwada kulmi jirnay goob lagu nasto ooy isugu yimaaddaan dhaammaan ardayda dugsiga.

Jacayl xaasid ma waaye'e, damac ayaa galay Iqra oo ah gabadh aan aad isugu dhawnahay, jacayl inay u bandhigto Yaxye oo markaasi xidhiidh wanaagsani naga dhaxeeyo ayay go'aansatay, waxay u kuur gashay siday ku meel marin lahayd dareenkeeda kuna baabi'in lahayd jacaylkayagan fadhi baradka ah, maalin maalmaha kamid ah ayay u timid iyada oo wadata warqad ay ku cabirayso inay jeceshahay Yaxye.

Laakiin anigu war iyo wacaal toona kama hayo. Yaxye mar walba waxaa uu u jajabanyahay dhanka hablaha maadama oo uu la dhashay hablo badan, waxaa uu u muujiya qadarin xushmad iyo waji furan oo ay ku dheehantahay Dhoollo caddeyn.

Aniga iyo jeexaygii oo wada fadhina goobtii laga nusa saacaynayay ayaa waxaa ii yeedhay macalinkaygii oo hawl ii direy.

Iqra waxay fursad u heshay inay u timaado Yaxye, u soo bandhigtana ujeedadeeda, anigoo muddo ku ahaa carqalad sida dhuun lafi gashay inay la kulanto, balse maanta waa fursad dahabi ah oon horey u soo marin .

Iqra waxay u timid Yaxye oo waxay fadhiisatay goobtii aan ka kacay, iyadoo ku billowday salaan diirran iyo Dhooloo caddayn, way wada kaftameen.

Waxaa soo dhaw wakhtigii lagu noqon lahaa fasalada, markay uga warantay inuu yahay wiil ay aad ujeceshay dushana ka ilaashanaysay muddo, ayuu ka aqbalay codsigeedi.

Badanaa waxaan is odhan jiray malaha Yaxye qaybta wax diidaa kuma jirto jidhkiisa. iyagoo sheekadii sii wata ayaa waxaa la garaacay jalaskii, taasooy macnaheedu ka dhigantahay fasallada hala galo wakhtigii nusa saacuhu wuu dhammadaye.

Macalinkaygii hawshii markaan u soo dhammeeyay, waxaan ku soo laabtay fasalkaygii oo wali uusan soo galin macalinkii noo lahaa maadada,

Waxaanse arkay gabdhihii aan asxaabta ahayn oo midiba midda kale afka hoos hayso, waa lawada mashquulsanyahay.

Waxaa laga sheekaynayaa inay Iqra xidhiidh la bilowday Yaxye, balse anigu ma ogi waxa laga sheekaysanayo, Sidii caadada ii ahayd waxaan dhexda u soo galay oon la fadhiistay gabdhihii aan isku kursiga ahayn.

Mar kaliya waxaa istaagay sawaxankii iyo buuqii fasalka, oo waxaadba moodaa inuu macalinkii soogalay, balse muu soogalin waa la aamusay waan fadhiistay, gabdhaha qaarkood way bedeleen mawduuca sheekadii ay kuwada sheekaysanayeen.

Laakiin wajigooda waxaan ka dheehanayaa in waxjiro xaalad layga qarinayo, Macalinkii ayaa noo soogalay fasalka.

Markii ay dhammaatay maadadii ayaa waxaa la gaadhay wakhtigii aan ka baxaynay dugsiga een tagaynay guryahayaga .

Yaxye waan isku lug dari jirnay markaan imanayno dugsiga iyo markaan ka sii hooyanaynaba, maantase xaalku sidaa wuu ka duwanyahay oo hee? Waxaan waayay Yaxye armuu fasalkooda macalin ugu jiraa ayaan isweydiiyay?. waxaan u soo dhaqaaqay dhankaas iyo fasalkiisi, waase kuraas madhan oo way hoydeen ardaydii, banaanka hore ee dugsiga ayaan u soo baxay anigoo isleh halkaas ayuu kugu sugayaa. Ardaydii banaanka taagnayd ayaan ka dhex goobay waanan waayay.

Waxaan u jahaystay goobtaan ka raaci jiray gaadhiga taga xaafadaha aan deganahay, intaan gaadhiga saarnaa waxaan isweydiinayay maxaa maanta ku dhacay jacaylkaagi?. waan u walwalsanaa dugsiga lama ogolaan jirin in loo soo qaato mobile ma jirto cid aan weydiiyo.

Waxaan socdoba gurigii ayaan soo gaadhay, Sidii caadada ii ahayd maan haleelin inaan iska bixiyo labbiska dugsiga, sababtoo ah jeexaygii Yaxye war kama hayo waxa maanta ku dhacay.

Waxaan sooqaatay mobile kaygii, oo dhawr qof isoo waceen, islamarkiiba waxaa igusoo dhacday Yaxye ayuu dhib ku dhacay oo isagaa kusoo garaacay, laakin xaalku sidaa wuu ka duwanyahay,oo isaga maaha cidda isoo wacday.

Daqiiqado kadib waxaan wacay Yaxye, mobile ku wuu dhacayaa oo wadnahayga ayaa aad u garaacmaya, su'aalo ayaan isweydiinayaa?, goor danbe oo uu sii go'ayo dhicitaankii ayuu nasiib wanaag iga qabtay.

Aswaan: Asalaamu calaykum qaali sideed tahay maanta waan kuu walwalay?.

Yayxe: wacalaykuma salaam quruxey qaali waan kuu wanaagsanahay,adigu sideed tahay naftaada iiga warran ? qaali madaxa ayaa i xanuunay macalinkuna fasalka wuu idinku raajiyay sidaa daraadeed ayaan aniga oo dawakhsan xaafadda utagay.

Aswaan; ax ! macaan hadda sideed tahay, ma ii wanaagsantahay?, Xubi allaha ii kaa caafiyo noloshu la'aantaa malaha qurux iyo qaayo toona.

Ma garan karo haddaan ku waayo sideen ku noolaan, jacaylkaagu aad ayuu ii saameeyay haddaan ku arki waayo magaranyo sidaan ahay, waxaad u tahay noloshayda wax walba oo adduunka ugu qaalisan.

Yaxye: Dheeman allaha iikaadaayo, sidaad ii tabayso si kadaran naftaydaa kuu tabaysa, waan wanaagsanahay hadda oo wax sidaa xanuun u sii ahi ima hayaan, niyadaada daji oo iskadaa walwalka faraha badan.

Aswaan; haye raggaba kaan kadoortow, waan kuu soo ducaynayaa inuu Alle ku caafiyo goormaan dhaayaha ku saaraa waan kuu xiisay macaan?

Yaxye: Xabiibi berito waxaan galaynaa imtixaan laga yaaba inaan is arki weyno, hayga xumaan noloshaydii haye idheh?

Aswaan; qaali kaama xumaanayo oo inaan ku arko caafimaadkaaga ogaado ayuun baan rabaa.

Yaxye; haye macan badan anigaa xaafadda kuugu iman inshallah, waan soo wada xidhiidhi doonnaa.

Aswaan; qaali allaha ii kaa daayo.waan kuu xiisay xubi. Niyadda aan isku hayno.

Yaxye; Haye maca salaaama .

Aswaan; haye macaan macasalaama nabadey, naftaada ii ilaali.

Markaan hubsaday inuu caafimaad qabo ayaan al-xamdulilah idhi, neeftii igu taagnaydna markaasaan si fiican u neefsaday, labiskii dugsiga ayaan iska bixiyay waan soo qabaystay kadibna waan tukaday, wax yar kadib waxaan isu diyaariyay inaan qadeeyo.

Laakin cuntadu iima dhadhamayso waan iskaga kacay, baryahan waxaan isku arkay sidii hore si ka badan inaan ujecelahay sidaan u fikirayay magaranayo goor aan seexday.

Galab liiq cadceedu madaxa la sii galayso godkeeda, waxaa xaafadda iigu timid saaxibadday, waxaase loo sheegay inaan hurdo, wey ii soo gashay waxay isku dayday inay hurdada iga kiciso,

“Aswaan….Aswaan……Aswaan.” ayay ileedahay. balse anigu ma maqlayo mana dareemayo inta ay ijiid jiidayso.

Waan soo kacay anigoo kala hadlaya indhahana waxba aan ka arkayn waxaan ku hadaaqayay “Yaxye….Yaxye” waaba saaxiibaday oo I agfadhida. Saaxib shaydaanka iska naar ayay igu tidhi “Acuudubillaahi minashaydaani rajim” ayaan ugu jawaabay.

Waxaa na loo soo diray inaan kawada shaqayno laylis shaqo guri ah. oo koox koox naloo qaybiyay, waanse iska ilaaway ballankaan lahayn oo waxaan niyadayda kujira kuna soo noqnoqonayey Yaxye.

Waan kacay, waan soo weysaystay, kadib ayaan tukaday salaaddii casar oo sii gabaabsi ah. waxaa soo dhaw salaaddi maqrib, sharaab iyo keeg ayaan kala soo baxay talaagadda.

Salaaddi maqrib kadib, waxaan billownay inaan kawada shaqayno laylis maadada afka soomaliga ah, oon markaasi aad ujeclaa waliba qaybta suugaanta & sheekooyinka.

Markaan dhammaynay layliskii ayaan u diyaar garownay inaan saaxibaday u sii dhaweeyo dhanka xaafadooda, waxaa gaadhay goortii aan ballanay Yaxye.

Nasiib wanaagse markaan wax yar xaafadda ka soo dhaqaaqay ayuu isoo wacay iina sheegay inuu u soo dhawyahay xaafadda.

Waan soo dhaqaaqay anigoo sugi kari la aragiisa saaxibaday meesha aan ku deg-degayo ayay I weydisay, waxaanse ku wargeliyay inaan Yaxye la kulmayo. " inankii aan isku dugsiga ahayn miyaa?" ayay iweydiisay haa ayaan ugu jawaabay.

Waa Yaxye oo si wanaagsan ulabisan, ma anigaa mise wuu u dhashay siduu ahaa si ka quruxbadan ayuu caawa ila yahay.

Wuuna salaamay, isaga oo aad moodid caawa inay tahay habeenkii uu dhashay macnaha farxadda iyo Dhoolo caddaynta ka muuqata wajigiisa.

Waan ka qaadnay salaan diirran, kadib waxay saaxibaday ii sheegtay inay soo gaadhay gurigoodii, wayna na macasalaamaysay.

Yaxye; xabiibi ii waran sideed tahay waaniga is keenay caawee?

Aswaan; Mashallah caawa dayaxa nuurkiisa ayaabad leedahay oo waad ifaysaa, haye ma caafimaaday, oo ayaa ku moodaba qaali qof xanuunsaday?

Yayxe; macaan miyaan layga dareemayn? Hadda waan wanaagsanahay mashallah xubi.

Aswaan; Yaxye qaali wakhti dheer ayaan soo wada soconay, aniguna ma qiyaasi karo sidaan kuu jecelahay, adigana dadaal ayaa lagaaga baahanyahay sidayda oo kale dibjirad ha noqon;

- Geesigaan dartii, dantaydii dhammaan
- Aan u daayacow, jacaylkaaga duruus
- Dunidaba dhammaan, igu filan daryeel.

Yaxye; oo markaad adigu dib jirad noqoto ma anigaa xariif noqon, miyaad ilowday xabiibi wakhtigaan dusha kaa ilaashan jiray, inay ardaydeena oo dhan jeclaysan jireen mawduucyada aad soo diyaariso.

Wakhti yarna waxaad ku soo noqotay qof ka soo caan baxay dugsiga. Imisa jeer ayaad guul u soo hoysay fasalkiina iyo dugsigaba miyaad ilowday? Igadaa ciyaarta macaan waad kaftamaysaa .

Aswaan; waad ogtahay in muddo ah markaan ku caashaqay inaan noqday qof u nugul jacaylka aan kuu qabo,waxaan gabay dadaalkii iyo kartidii aan lahaan jiray, oo waa laygaga guuleystaa waxbarashada.

Hadda fasalka dhexdiisa dadkii aan ka guulaysan jiray een fagaaraha kaga wacnaan jiray, maanta anigaa layga guulaystaa oo waxaan ahay damiinadda aan kuu sheegayo.

Jacaylkaan kuu qabo maaha mid sahlan, oo maalinkaan ku arkay laabtayda waxaan ka dareemay wax kulul waan ku jecelahay Yaxye.

Yaxye; Aswaan qaali sidaa ha odhan waan ogahay inaad ijeceshahay, aniguna sidoo kale waan kaa daranahay.

Wakhtigu wuu cararayaa oo badanaa markaan Yaxye la joogo saacaddu waxay igu noqotaa saddex dadiiqo in le'eg.

Waxaan ku war helnay muusiqa idaacaddaa BBCda oo ka baxay dukaan wax yar noo jira goorsheegtu inay ku beegantahay 9;0O fiidnimo ayaan ogaanay, waan is macalsalaamaynaa haddana ma kala tagno .

Qiyaas ahaan tobaneeyo jeer ayaan is macasalaamaynay haddana aanan kala tagin Waan ka soo dhaqaaqay waxaanan imid guriga, waxaa caado noo ahayd habeenkii markan sii seexanayno inaan wada hadalnaa.

Mar-mar markaan u fiirsado waxaan ka wada hadlayno malaha wax micno ah, hadana waan wada qoslaynaa oo maba garanayo waxaan ku qoslayno,

Farxaddaydu aad ayay u sarraysaa, is malihi waligeyna kumaan fikirin inaan waayayo Yaxye noloshana aan isaga dartii uga mid noqon doono dadka u dhibban jacaylka, waxaanku waaberistay farxadda iyo Dhoolo caddayn, waxaan diyaariyay quraacdii xaafada .

Wax yar kadibna waxa aan u soo Anba baxay dugsiga. Anigoo ku soo labistay labiskii dugsiga, gaarka u ahaa, Yaxye ayaan sugayaa inuu isoomaro,

nasiib wanaag anigoo niyada ku haya ayaan soo baxay waaba Yaxye oo soosocda.

Waxaan isu soo raacnay ilaa dugsiga markaan soo gaadhnay waxaan nimid wakhti lagu jiro faylka, sidii ayaan ku kala leexanay isaguna qaybta ragga ee fasalkooda ku daba faylay aniguna qaybta fasalkayga ee hablaha ku leexday.

Markaan galnay fasalkii ayaa gabadh aan asxaab nahay ii keentay warqad ay uqortay inuu Yaxye u soo jawaabay oo uu ka aqblay codsigii gabadhii. Waan madoobaaday maalinkaas waxba maan dhigan.

Waan murugaysnaa tallaabadan uu ku kacay Yaxye, marka si aan u fiiriyo waxaan islahaa waa dabin ay soo mala awaaleen. marka dhanka kale aan ka eegana gabadhani waa gabadh run badan. Maalinkaa igu maysocon waxbarashadu waxaan ka fikirayay Yaxye sababtuu sidaa u sameeyay, madax xanuun iyo fikir ayaan ka bixi waayay .

Inta aan la fasaxin ardaydii waan u adkaysan waayay inaan siiwato waxbarasho maalmeed kaygii fasax ayaan ka qaatay maamulaha dugsiga.

Xaafaddii ayaan tagay anigoo madaxu aad ii xanuunayo, su'aalo faro badan ayaa igu soo noqnoqnaya.

Anigoo jooga ayuun baan baxaa dhulku cidhidhi ayuu igu yahay. wakhtigii Hadhimada ayaa la joogaa waxaan is idhi bal weydii waxan la sheegayo wax ka jira?

Gabdhaha qadarin iyo mar walba xushmad gaar ah ayuu siiyaa, dabeecad wuxuu leeyahay ma shaqeyso qaybta diidmadu .

Aswaan;war side tahay ii waran.?

Yaxye;waan fiicanahay Aswaan xaaladada?

Aswaan; Yaxye maxay ahayd naagtan aad xidhiidhka cusub la bilowday?

Yaxye; Naag sidee ah xabiibi, maxaad ka wadaa hadalkaaga

Aswaam; maxaad isla indho tiraysaa iiguna maaweelinaysaa been. Runta maad sheegtid way iga nixin ee idili maysee.

Yaxye; qaali ma jiro wax xidhiidh ah oon bilaabay, aan ahayn kaaga, is daji iskuna day inaad ifahanto aswaan.

Aswaan; Warqadda aad kaga aqbashay jacaylka, gabadhu kaa codsatay waan arkaye maxaad isu dhaafin.

Yaxye; Maa anaad i aaminaysaa, mise kuwan warxuma tashiilka ah.

Aswaan; waan garanayaa hab qoraalkaaga, kamana habaabayo, waxaad ugu talo gashay inaad dhaawac ii geysato.

Yaxye; Aswaan si walba oon wax kuu fahansiin karo waan isku dayay, laakin ima aaminaysid haddii ay noqoto inaan xidhiidh bilaabbo ikhtiyaarka anigaa leh adigana kaalama tashanayo arrinkaas.

Aswaan; haye taasaad la timid, mar hore maad i sheegtid maxaad ii lug goysay qalbigana maxaad iiga jabisay farxadaydii maxaad u baabiisay, anigoo ku aaminay maxaad ii irdhiisay.

- nabsi baan ku raacshee
- anigana nasiibkay.

Sidaa ayaan ku waayay jacaylkaygii, waxaa iga keentay cadho iyo hinaaso aan ka hinaasay naagti aan isku dugsiga ahayn, isaguna waxa uu ka sii xanaaqay amarka aan siinayo oo naag amraysa ayuu diidanaa.

Maalmo markay ka soo wareegeen een cadho baxay, waxaan tabay oon ka qoomameeyay sidii deg-degu ku jiray een ku waayay jacaylkaygii Yaxye.

Burburkii jacaylkayagu wuxuu saamayn ku yeeshay noloshaydii, Yaxyena wuxuu ka badashay dugsigii aan wada dhigan jirnay.

Oo dugsi kale ayuu ka sii watay fasalada u diyaar garowga jaamacadda, wakhti dheer ka dib waxaan codsaday facebookga oo markaasi cusbaa, saacado gudaheed wuu iga aqbalay.

Yaxye; Ma Aswaan taydiibaa?.
Aswaan; Maya walal Maaha

Isla markiiba isagoon muddo ila soo hadlin ayuu iga soo wacay mobilekii gacantayda, waa naf aan jecelahay oonan ka maarmi kareyne ma ka qabataa maya ….haye ayaan is weydiinayay?
Waan ka qabtay, wuxuuse iweydiiyay inaan ahay Aswaan.waxaan se u sheegay inaanan aniga ahayn, iswareysi dheer kadib waxaan u sheegay inuu nolosha igu cidleeyay oo uu kali igaga tagay macaan maxaad sidaa iigu gashay? Wuxuuse sii sheegay inuu ijecelyahay aniguna aan dareemi waayay, uu aadna ii danaynayay balse uu hoos u riday xanaaqii iyo khiyaamadiisii jacaylkii aan isu qabnay.

23 december 2012 waxay ku beegnayd wakhti noloshayda farxadeedu soo laabatay oon xidhiidhkii dib u bilownay anigu qof wax jecel ayaan ahay.

Waan ka adkaysan waayay hadaladiisii iyo jacaylka soo laba kacleeyay walow aan garanayo inaanu khayr badan ka soo socon, aqbalaadda kadib in door ah ayaan markale xidhiidhkii sii wadnay.

Wakhti kooban kadib waxaa soo noqday is fahan la'aantii oo uu soo celiyay markale oo hawlihiisi ayuu bilaabay. waxaan ka dareemay inuu hoos u sii dhacayo jacaylkii,igama qabto telephoneka gacanta.

Wuxuu galayaa imtixaankii fasalka 12aad ee u diyaar garowga jaamacadda. Waan ka yareeyay wicitaankii badnaa intuu ku jiray imtixaanka.

Wakhti dheer ayay igu qaaddatay inaan markale fursad u helo inaan hadalkiisa maqlo,sababtoo ah way adag tahay inuu iga qabto inuu ila soo hadlana haba sheegin, Maalin ayaan ka wacay IMO,wuu iga qaban waayay, markale ayaan ku celiyay bal inuu iga qabto, nasiib wanaag wuu iga qabtay waxaan ka wareystay xaaladiisa.

Waxaan ka codsaday inaan qoral kuwada hadalno wuu iga aqbalay. " Yaxyow wakhti dheer ayaan soo wada qaadanay, farxad iyo murugo baleh, waxaan dareemayaa inuu dhankaagii ka soo dhammaaday jacaylkii".

Waad ogtahay inaanan anigu kaa maarmi kareyn, xumaantaad dooni ii gayso, wali qof ku jecel ayaan ahay qaali xabiibi fiicnaan lahaydaa adigoo markale soo celiya rajadii nolosheena. Waan ku jecelahay Yaxye, hadday xal kuu noqotay sidaa, kuguma qasbayo inaad ii soo laabato farxad ku noolow goor kasta."

Wax jawaab ah kamaan helin,waxaan maqlay inuu kamid noqday ardayda nasiibka u yeelatay inuu u gudbo waxbarashada heerka jaamcadda. Anigu fasalka 11 aayan dhigtaa.

Waxaan ahay ardayda aan niyad iyo rajo ka lahayn waxbarashada, Waan ka moral jabay noloshaydii qof la'aantiis ayay noolan kari ladahay, waxaan noqday maqane jooge.

Ilayn gabdho cad-cad ayaa la dhigta jaamacadda aniga muxuu igu fali, maalinkaas kadib illinta indhahayga ka da'aysa waxa ay noqotay mid joogto ah.

Anigoo iska fadhiya ma garanayo goor ay illintu iga soo daadatay,waa la ila yaabayaa!! Oo qof kasta waxaa uu I weydiinayaa maxaa dhib jira.?

Anigoo Dhoollo caddeynaya ayaan ugu jawaabaa "maya baryahan indhahaa i xanuunaya oo way i illmaynayaan,wax dhib ah majiro."

Qof kastana oo ila kulma wakhtigan madow waxaa uu igu war galinayaa inaan dhakhtarka tago laga yaaba sidan inaan sii dhaamo e .

Baal madow ayaa ii furmay noloshayda maalmo, todobaadyo,bilo.iyo sanado ayay igu qaadatay wali aan sii hayo xasuusta jacaylkaygii Yaxye, qalbigayga waan samir siin kari laayahay waddada markuu igu arko wuu iiga baydhaa.

Gabadhi dugsiga aan wada dhigan jirnay ayay isku macaan yihiin, warkooda maalin walba waan maqlaa, waa ii kadeed iyo dhibaato joogto ah.

Waxaa isugu kay biirey aqoon la'aan iyo jacayl la'aan, waxba ma akhriyo mana qoro sidii wakhtigaan dhigan jiray dugsiga hoose, waa la ii qoraa maalin kasta, foodda waxaa nagu soo haya imtixaankii u diyaar garowga jaamcadda oo maalmo kooban naga xigo.

7 may 2016 waxay ku beegnayd maalinkan u fadhiistay imtixaanka, bisinka ayaan hoosta ka akhrisanayaa inuu ilahay ii sakhiro, fasalada ayaan kala galnay iyadoo ardayda la kala qaybiyay isku badni aawadeed.

Maadadii koobaad ayaa naloo qaybiyay, waan ka shaqeeyay?, Waxaan ahay maqane jooge su'aasha koobaad markaan ka shaqeeyo intaanan ta labaad gaadhinba fikir ayaan bilaabayaa, oo badweyn ayaan ku dhex dabaalanayaa, war-warkan ardayda ka haysta imtixaanka anigu maba dareemayo.

Maalin labaadkiina sidii oo kale ayaa igu dhacday, markaan ka baxay imtixaankii ayaan xaafadda tagay anoo aad u dawakhsan.

Goor duhur ah ayaan seexday, waxaan soo baraarugay xilli fiid ah, oon u haystay inay casar gaaban tahay

Xal maaha go'aan waxaan ku gaadhay berri oo ah maalinkii saddexaad ee imtixaanka inaan la kulmo xabiibkaygii Yaxye.

Waan wacay waxaana la ballamay berri oo 13 may 2016 ku beegantahay waa maalin jimce ah salaadda casar ka bacdi

Waxaan kuwada kulanay guriga walashay iga weyn faadumo, waa maalinkii iigu horaysay dhawr kaa sanadood een wada socono oon guri kuwada kulano.

Waan is xaal wareysanay, sharaab macmacaan kuwada qaadanay. Waxaa na dhex martay dood aad u kulul, " maxaad igu nacday?." Ayaan weydiiyay balse jawaab aanan ka filanayn ayuu iigu jawaabay, isaga oo wajigiisa ka muuqato murugo ayuu waxa uu I yidhi.

" Kuma nicin Aswaan, sidaa ayaan xal u arkay, aan kala hadhno qof kasta wuxuu qaadi calafkuu Eebbeheen u qoray." Illin kulul ayaa iga soo daadatay oo waan baroortay anigoo ku leh;

- jacayl ii dhuuntaa; ani igu dhacoo
- dhaayo ooyaybaa; dhabankay rushoo
- caku dhalan roga; waan isdhiibaye
- qalbi dhaawacan; sidee loo dhayaa?

" Yaxye intaad iga maqnayd habeen si fiican umaan ladin, sidaa hadaad garatay maxuma ilahay ayaan rajo san ka sugaayaa." anigoon awood u lahayn inaan sii hadlo oo uu hadal ku idhibayo ayaan ugu jawabay.

Noloshiisa waligii gacantiisu jidhkayga may taaban, wuxuu damcay inuu iga tiro ilmada, balse waxaan u sheegay inuu awood u lahayn inuu iga tiro uuna yahay ka iga keenay illinta aanan u ogalayn inuuna taabto jidhkayga.

"Maalin danbe kuma cidlaynayo" ayuu igu yidhi isaga oo niyadda ii dhisaya, waxaanse ogahay berri inuu halkiisii ka sii bilaabi doono ilayn bahal caadadii ma daayo.

Wali rajo ayaan ka qabaa dhiniciisa wuxuu iga ballan qaaday inuu nolosha ila qaybsanayo dhib iyo dheefba, haye iyo haye ayaan isku macasalaamaynay waxaan u soo dhaweeyay goobtii laga raacayay baska.

Markaan ku soo laabtay gurigi ayaan waxaan galay xasuus aad u macaan, marka si loo eegana aad u qadhaadh.

13 may 2011 waxay ahayd maalinkii ugu horaysay ee aan warqad u qoro Yaxye. Oo haddaan ku xasuusiyo waa tii saaxibaday igala oroday ee u geysay Yaxye warqadii .

Maanta waa 13 may 2016 ma qiyaasi karo siduu isu beddelay xaalku maalin kaa sidaan ahaa iyo maanta sidaan ahay iskuma dhawi.

Laba maalin kadib, halkiisii ayuu ka sii bilaabay oo inuu telefoonki i soo Waco iska daaye haddaan Waco igama qabanayo, waxaan isu maaweeliyay inaan ahaado qof ad-adag. Noloshuna berri way isbaddeli sidan sii ahaan mayso.

Waxaan maqlay inuu shil dhacay galabta, waa june 1 2016. Niyaddu madeggana waxaan isleeyahay billow Yaxye ku jiraa dadkaa waxyeeladu ka soo gaadhay shilka. Jidhkayga waxaan ka dareemayaa dareen nooc kale ah. Waan xamili waayay inaan sii joogo guriga, balse waxaan wacay numberkiisi oo waa lama heli karo walwalkii ayaa igu sii siyaaday.

Goor maqrib ah ayaa waxa i soo wacay Yaxye walaalkii, wuxuu ii sheegay war dhiilo igu noqday in uu Yaxye dhaawac ka soo gaadhay shilka galabta cad-ceed dhicii ka dhacay suuqa.

Waan isku dhex qasmay, waan ilmeeynayaa waxaan doonayaa inaan ugu tago dhakhtarka balse guriga walaalo ayaan joogaa, waxaan u sheegay inaan xaafaddii tagayo, laakin aabbo ayaa ila soo hadlay iina sheegay inay habeen tahay, haddaan imanayana subaxa aan imaado guriga, waa aabbo oo ma diidi karo haye ayaan ku idhi.

Waxaan wacay Yaxye walaalkii kana wareystay sida uu yahay " wax dhibaato weyni may soo gaadhin ee waa waxyar walaal, niyadaada deji inshallah subaxa ayuun baad u iman." Ayuu igu yidhi.

Habeenkii waan iska seexday, warkii waxaa maqlay xaafadda, walaalkay ayaa waxa uu hooyo u sheegay arrintii aan muddada dheer qarinayay. Hooyo canaan iyo hadalo kulul ayay cadho igula dul dhacday.

Subaxnimadii ayaan ugu tagay dhakhtarka isaga oo caafimaad qaba sheekaynayana, waxaan u sheegay wixii dhacay, wax dhiba malaha ayuu iigu jawaabay, waan fiicanahay hadda.wuxuuna ii sheegay in maanta laga saarayo dhakhtarka.

Maalmo kooban uun kadib; waxaa uu barta facebookga uu ku soo qoray "Haddii jacayl la toogan karo, qofka ugu horreeya ee toogtaan ahaan lahaa". Waan yaabay markaan arkay qoraal kaasi waxaan damcay inaan la hadlo inta uuna ii soo jawaabinba. Waxaa uu isaaray block. Telephone kiisa ayaan wacay igama qabanayo.

Ilayn waayeel tag lama yidhaahdee, wuxu ku tagaa la tusaa. Maalin kaa wixii ka danbeeyay waxaan go'aansaday inaanan nin danbe isku helaynin ee aan dhabar adaygo samirkana qoysto.

Waxaan bilaabay dadaalkii yaraantaydii oon dib u soo celiyay, waxaan ka mid noqday markale ardayda jaamacadda ugu magaca dheer.

Mararka qaarkood waan xasuustaa oo ma ilaawi karayo balse inta badan waxaan isku dayaa inaan naftayda horumariyo oon qayrkeed gaadhsiiyo.

Ugu danbayntii waxaan farriin u dirayaa gabdhaha walaalahay ah, ee xidhiidhada ma la awaalka ah la sameeya ragga waraabayaasha ah, walaashay noqo qof nolosheeda ka dhigta ta ugu wanaagsan ee gabadh aduunka ku nooli ku nooshahay.

Raggana waxa aan u dirayaa farriin ah; gabdhaha ka daaya jacaylka aad ku beeraysaan maanta eed kaga baxaysaan berri.

- Malo awaal jacayl, ilayn waa ibtilo
- Lagu ambadoo, kaan u eersadaa
- Adhaxday jabshoo, axdigii lunshee
- Raggu aamin maleh, mana oofiyaan
- Wacad ay galaan, waxaan uga socdaa
- Imisay haween, aayo seejiyeen?
- Waxaan idinka digay, umal iyo dhibe
- Hablayahow eedaad, haw eersanina.

DHAMMAAD.

Xuquuqda sheekada "**Axdi maleh raggu jacaylna waa iblays",** Umalkheyr Cabdirisaaq Axmed "Arabsiyo" buugeeda Ubaxii Qaadhay.

GABO-GABO

Waxay mahadi u sugantahay ALLAH, caafimaad qab iyo maskax taam ah i siiyay, danbi dhaaf, cimri dharar, cibaado suuban, ayaa inooga baryayaa dhammaanteen.

Si guud waxaan ugu mahad celinayaa dhallinyaradii igala qayb qaatay buuggan, inta magacooda aan xusay iyo inta aan hilmaamayba, waxaa iga go'an inaan horumariyo afkeena, dhaqankeena, iyo bulshadeena .

Buugga qalbiyada dhaawacan inshallah noqon maayo buuggii igu horeeyay iiguna danbeeyay, mustaqbalka dhaw iyo ka fogba waxaan jecelahay inaan bulshada u soo saaro wax anfaca, aynu u hiilino afkeena hooyo.

ALLA MAHAD LEH.

Waxaan jeclaan lahaa inaad ila wadaagto talo, tusaale, waydiin, soo jeedin, bogaadin, adigoo igala soo xidhiidhaya ciwaanadan.

Mobile; +251915213200.
E-mail; Hassannur53@gmail.com
Facebook: Xasan Nuur Kaabe
Mahadsanid.